# AKHRI OO BARO MARKOS

## HORDHAC

Kusoo dhowow qoyska Masiixiyiinta! Marka aan sidan leeyahay, waxa aan filayaa inaad hadda uun noqotay Masiixi oo aad iibsatay amaba lagu siiyay buuggan yar, si uu kaaga caawiyo inaad akhrido Kitaabka Quduuska ah. Waxaanan rajaynayaa inuu kaa caawin doono arrintaas.

Kitaabka Quduuska ahi siyaabo kala duwan ayuu u tilmaamaa waxa uu yahay Masiixi. Waxa uu yidhaahdaa oo uu tilmaamaa in qofkaasi 'badbaaday' ama uu 'noqday Masiixi' ama uu 'dib u-dhashay', ereyadan ugu danbeeyaana waxa ay Masiixiga ku baraarujinaysaa xaqiiqada ah inuu hadda ka mid yahay qoyska Eebbe. Rasuul Yooxanaa waxa uu arrintan u dhigayaa sidan: "laakiin in alla intii aqbashay, wuxuu siiyey amar ay carruurtii llaah ku noqdaan, kuwaasu waa kuwii magiciisa rumaystay" (Yooxanaa 1:12).

Markii Ciise uu ku duldhintay iskutallaabta waxa uu bixiyay ciqaabka denbigaaga, markii uu dhimashada ka sarakacayna waxa uu adiga dartaa uga guulaystay denbiga iyo dhimashada. Marka aad aqbasho Ciise Masiix, kuuma aanay bilaabmin nolol cusub oo keli ahi, balse waxa aad heshay nolol cusub oo kula bilaabantay. Adigoo ka mid ah carruurta Ilaah waxa aad ogaan kartaa in lagaa xoreeyay denbiga iyo inaad awoodda Ilaah kaga adkaan karto jarribaadda, adiga oo xakamaynaya ficilladaada, fikirradaada isla markaasna u noolaanaya si Ilaah raalli gelinaysa.

Hadda kadib si shaqsi ahaaneed ayaad isugu hallayn kartaa ballanqaadyada Eebbe, sida tusaale ahaan ballanqaadyada ku xusan Yooxanaa 10:28 halkaas oo Ciise ku leeyahay, “Oo waxaan iyaga siiyaa nolosha weligeed ah, weligoodna ma lumi doonaan.” Runtii tani waa ballanqaad cajiib ah! Waxa ay middani ka dhigantahay inaad weligaa ahaan karto mid ka tirsan carruurta Eebbe iyo in aanu jirin wax isaga kaa fogayn kara. Sida Yooxanaa uu leeyahay, “Kii Wiilka rumaystaa, wuxuu leeyahay nolosha weligeed ah” (Yooxanaa 3:36).

Hase ahaatee ilmaha yar ee dhashay wuxuu u baahanyahay inuu koro! Dhalashadu waa bilowga nolosha, dhalashadan cusubina waxa weeyi bilowgii nolosha ruuxiga ah. Sideed uga kori kartaa xagga ruuxa? Waxaan rajaynayaa inaad arrintan arki doonto marka aan buuggan akhrisano, laakiinse aan labo waxyaalood kugula taliyo inta aynaan bilaabin akhrinta buuggan ka hor.

1. Hubi inaad ducaysato! Ducadu maaha inaad Ilaah wax weydiisato oo keliya, balse waxa weeyi jid Ilaah kuugu banneeyay inaad isaga xidhiidh joogto ah la yeelato. Tukashadu waxay inoo suurto gelinaysaa inaan Ilaah ugu mahadnaqno wanaaggiisa, inaan raadino hanuunintiisa iyo awooddiisa iyo inaan ku barino Ilaah barakooyinka uu innaga iyo dadka kaleba siiyay.
2. Kitaabka Quduuska ah si joogto ah u akhri. Rasuul Butros isagoo farriin u diraya Masiixiyiin aan wakhti fogayn Masiixa rumaysatayay, waxa uu iyaga ku boorriyay: “oo sida carruur dhallaan ah u jeclaada caanaha ruuxa ee saafiga ah, si aad ugu kortaan xagga badbaadada, haddii aad dhadhamiseen in Rabbigu raxmad leeyahay” (I Butros 2:2-3).

Sida ilamaha yariba uu jir ahaan ugu xoogaysto dhamista caanaha saafiga ah oo kale, carruurta Ilaahna waxa ay Kitaabaka Quduuska ah ka helayaan raashinka ruuxiga ah ee ay ku korayaan.

Laakiin maadaama ood tahay Masiixi cusub waxa laga yaabaa inaad is-weydiinayso meeshii aad wax ka bilaabi lahayd? Middan jawaabteedadana waxa aad ka helaysaa *Akhri oo Baro Markos*! Axdiga Cusubi waxa uu ka koobanyahay afar Injiil, oo midkastaaba uu sheegayo sida ay ahayd noloshii Ciise Masiix intii uu ku noolaa dunida guudkeeda. Injiilka ugu gaaban ee qoraalkiisu ugu horreeyay injiillada waxa uu ahaa kan uu qoray Markos. Waxa aan haddaba buuggan yar ku qaybiyay injiilka Markos oo aan u qaybiyay 45 cisho oo maalin walba qayb la akhrinayo. Haddii markaa aad qorshahan raacdo waxaad noloshii Masiixa ku baran karta muddo gaadhaysa lix toddobaad, markaad sidaas yeeshana waxaad wax badan ka baran doontaa nolosha Masiixiyadda.

Waxaan haddaba soo jeedinayaa inaad buuggan u isticmaasho sidan:

1. Marka aad maalin walba bilaabayso akhrinta Kitaabka Quduuska ah, ducayso oo Ilaah weydiiso inuu ku fahansiiyo waxa aad akhrin doonto.
2. Qunyar u akhri qaybta aad akhrin doonto oo ku taalla bilowga bogga (tusaale ahaan, maalinta ugu horraysa akhri Markos 1, aayadaha 1-11).
3. Akhri sharraxaadda adigoo dib u eegaya aayad kasta meesha lagu sharraxayo isla markaasna adeegsanaya tixraacyada lagu xusay halkaas.
4. Eeg aayadaha lagusoo xigtay bogga xaggiisa hoose, kana fikir sida ay ugu habboontahay akhris maalmeedkaas.
5. Qaado oo qoro waxkasata ood aragto oo ku caawin kara.

6. Ku ducayso in Ilaah kugu caawiyo inaad ku camal-fasho waxa gaarka ah ee ereygiisu kaa rabo inaad fuliso.

Imika waxaad haddaba bilaabi doontaa akhrintaada ugu horreysa. Waxaan Ilaah ka baryayaa inuu ku siiyo barakooyinkiisa maalmaha soo socda oo uu kaa caawiyo inaad ku korta ‘nimcada iyo aqoonta Rabbigeenna ah Badbaadiyeheenna Ciise Masiix’ (2 Butros 3:18).

## Markos 1:1-11 — Maalinta 1

## La-Cafiyay!

Waxa aad hadda uu bilowday nolosha Masiixiyadda oo hadda ayuunbaa kuugu horraysa inaad si joogto ah u akhrido Kitaabka Quduuska ah. Waxa hubaala ah inaanay jirin ereyo ka wanaagsan kuwan: “Bilowgii injiilkii Ciise Masiix….” (v.1). Ereyga ‘injiil’ waxa uu la macno yahay ‘war wanaagsan’, kow iyo tobankan aayadoodna waxay inoo sheegayaan waxyaalaha arrintan ku saabsan.

**Waxa wacdiyay Yooxanaa**. Waxa uu ahaa oo ilaa hadda uu yahay injiil cajiib ah! ‘dembidhaafka aawadiis’ (aayadda 4): marka Ilaah cafinayo qofka denbigiisa waxay ka dhigantahay in laga nadiifiyay oo laga tirtiray. Waxa aad eegtaa ballanqaadka uu Ilaah siiyay Yeremyaah sida ku xusan 31:34. Laakiin u fiirso inta aan qofka laga cafiyin denbigiisa waa inuu yimaaddo ‘towbad keen’ (aayadda 4). In la toobad keeno waxay ka dhigantahay qofka oo beddela qaab-fikirkiisa oo taasna ay raacdo beddelitaanka dabeecaddu. Xagga denbiga marka la eego waxay ka dhigantahay in gebi ahaanba dhabarka loo jeediyo. U fiirso sida uu Ciise Masiix uu isula xidhiidhiyay injiilka iyo towbad-keenka sida ku xusan aayadda 15 (oo ah qaybta la akhrin doono berri). Miyaad amarkiisa si hubaal ah u addeecday? Haddii ay sidaas tahay, waxa aad sheegan kartaa ballanqaadyada Eebbe.

**Waxa bixiyay Ciise**. Bushaarada ugu wanaagsan ee weligeed dunidu maqashay waxa weeyi ‘warka wanaagsan ee ku saabsan Ciise Masiix, Wiilka Ilaah’ (aayadda 1). Yooxanaa wuxuu ogaa inuu jidka usii xaadhayo ‘mid isaga ka itaal weyn’ (aayadda 7). Yooxanaa wuxuu ahaa rasuulka farriinta sida; Ciisena waxa uu ahaa farriinta! Ciise waxa uu oggolaaday inuu isaga Yooxanaa baaabtiiso, hase ahaatee Ciise uma baahnayn in la baabtiiso waayo denbi muu lahayn (akhri sida ku xusan Cibraaniyada 4:15), balse waxa uu isla meel dhigayay denbiilayaasha. Wiilka Ilaah waxa uu ammaantiisii samada ugasoo tegay inuu innaga inagula mid noqdo dhalashadiisa, baabtiiskiisa, noloshiisa, waxa kaloo intaas kasii wada wayn dhimashadiisa, waayo sida uu Butros ina xasuusinayo, ‘Oo isagu dembiyadeennii wuxuu ku qaaday jidhkiisii geedka saarnaa’ (I Butros 2:24). Ciise waxa uu ka badnaa tusaale keliya; waxa uu galay halkii aad adigu taagnayd isaga oo maray ciqaabta denbigaaga. Waxa uu u dhintay waxay ahayd si aad adigu u hesho cafiska. Haddaba wakhti ku qaado inaad ku faraxdo oo ku rayrayso xaqiiqadaas cajiibka ah.

“*Sidii Ilaahba Masiixa idiinku cafiyey*” (Efesos 4:32).

**Maalinta 2** **Markos 1:12-28**

## Saddex Hantiyood oo Waaweyn

Aayadahani waxay koobsanayaan u yeedhitaankii xertii ugu horreysay iyo dhacdo cajiib ah oo ka dhacday Kafarna’um, laakiin aynu hadda diiradda saarno uun saddexda waxyaalood ee ugu waaweyn eed hantiyayso marka aad Masiixi tahay.

Aayadda 17aad waxa aad ku arkaysaa **qof ay tahay in la raaco**. Ciise waxa uu helay Simoon (Butros) iyo walaalkiis Andros oo badda dhineceeda taagan waxaanu iyaga ku amray: “Isoo raaca.” Markiibana waxkasata oo ay haysteen way ka jeesteen oo isaga ayay raaceen oo dib danbena ugumay noqonin dabeecaddoodii hore. Haddaba imika marka uu adiga kuu yeedhay inaad isaga raacdo, waxa aad go’aansataa inaad Ciise raacdo oo uu kuu noqdo tusaalaha aad ku dayato dhinac kasta oo noloshaada khuseeya.

Waxa kale oo aayaddu ay ka hadlaysa **awood iyo karti**. Ciise isaga oo hadalkiisa sii wata waxa uu yidhi, ‘…waxaan idinka dhigayaa…’ Awood noocee ah ayuu haddaba Ciise uu leeyahay? Waxa uu leeyahay awood uu wax ku abuuro (Yooxanaa 1:3); awood uu wax ku daweeyo (Matayos 8:3); awood uu wax ku maamulo (Luukos 8:24); laakiin intaas oo dhan waxa ka sarraysa, awood uu ku beddeli karo dadka noloshooda. Maadaama oo Ciise hadda uu kugu dhex jiro isagoo adeegsanaya Ruuxa Quduuska ah, awooddani waa mid kugu filan oo kuu suurto gelinaysa inaad la tacaasho dhibaatooyinkaaga. Kitaabka Quduuska ahi

waxa uu inoo sheegayaa in Ilaah kaa dhex shaqaynayo si waafaqsan meelmarinta ujeeddooyinkiisa (Filiboy 2:13).

Aayadda dhammaadkeedana waxaad ka arkaysaa **inay jirto ujeeddo la rabo inay la fuliyo**. 'Kuwo dadka jillaabta'. Waxa cajiib leh in la ogaado iyadoo Ilaah uu noloshaada ka leeyahay ujeeddo, waxaanad middaas hubin kartaa marka aad isaga ku xidhnaato. Ujeeddadaasi waxa ay doontaba ha ahaato, laakiin waxa hubaal ah inay koobsanayso jillaabasho. Haddaba, ha ka xishoon Badbaadiyahaaga laakiinse hadda laga bilaabo ku ducayso inuu kuu adeegsado inaad dadka kale isaga xaggiisa usoo jihayso. Dadka kale tusaale noloshaadu ha u ahaato si ay u arkaan Sayid Ciise Masiix. Matayos 5:16 ayaana middan si wanaagsan uga hadlaysa.

"*Innagoo fiirinayna Ciise oo ah Bilaabaha iyo Dhammeeyaha rumaysadkeenna*" (Cibraaniyada 12:2).

**Markos 1:29-45** **Maalinta 3**

## Badbaadiye Cajiib ah!

Akhrinta maantu waxay ka hadlaysaa afar dhacdo oo kala duwan, laakiin haddaad wada eegto, waxaad arkaysaa inay dhammaantood tusaalaynayaan labo xaqiiqo oo waaweyn oo ku saabsan Sayid Ciise Masiix.

**Danayntiisa qotoda dheer**. Waxaynu aayadahan ku arkaynaa dhibaatooyin kala duwan. Butros soddohdiis way xanuunsanayd oo way jiiftay, waxa kale oo jiray dad badan oo qabay xanuunno kala gedisan, sidoo kale waxa uu arkay nin isna qabay baras – dhammaantoodna Ciise dadkan waa uu danaynayay. Ciise waa "waa isku mid shalay iyo maanta iyo weligiiba" (Cibraaniyada 13:8), waxaana hubaal ah inuu danaynayo noloshaada maalin walba. Ma jiro sida uu doonaba ha u weynaadee wax aanu Ilaah qaban karini, sidoo kalena ma jiro haba yaraadee wax aanu danaynini. Si kastaba ha noqotee, u fiirso iyadoo Ciise uu maalinta ku bilaabay tukasho sida ka muuqata aayadda 35! Waxay doontaba ha kugu qaadatee adna maalintaada ku bilow tukasho adigoo Ilaah weydiisanaya inuu maalintaadaas barakeeyo waxkasta ood qabanayso. Haddii aad rabto tusaale taas ku saabsan oo ka mida Axdiga Horena waxaad eegtaa waxa uu Daa'uud ku qoray Sabuurka 5:3.

**Naxariistiisa Ilaahiga ah**. naxariistu way kasii badantahay danayn oo keliya. Waxa weeyi jacayl uu ficil la socdo. U fiirso waxyaalaha uu Ciise sameeyay. aayadda 31 waxa uu u tegay Butros soddohdiis oo wuxuu ka caawiyay inay ka kacdo jirradii haysay; sidoo kale aayadda 34 waxa uu bogsiiyay dad badan; sidoo kalena sida ka muuqata aayadda 41 waxa uu nadiifiyay ninkii barasta qabay! Halkan waxa haddaba ka muuqda jacaylka Ilaah oo ficil ku dheehanyahay, isaga oo kaalmaynaya dadka baahiyohooda kala duwan. Haddaba, maadaama ood tahay Masiixi barbaar ah, waxa laga yaabaa inaad u baahato inaad u baahantahay in lagaa kaalmeeyo waxyaabaha noloshaada soo kharribay sidii aad uga kori lahayd. Waxaad u baahantahay in lagaa bogsiiyo dhaawacyada iyo cabsida kaalasoo deristay denbiyadaadii hore, sidoo kalena waxa hubaal ah inaad u baahantahay in

maalinkasta lagaa dhigo mid nadiif ah. Marka aad garawsato baahiyahaas jira, waxaad ogaataa inaad haysato Ciise Masiix oo ah Badbaadiye cajiib ah oo waxyaalahaas oo dhan kaa caawin kara.

**"***Welwelkiinna oo dhan isaga saara, maxaa yeelay, isagu dan buu idinka leeyahay***"** (I Butros 5:7).

**Maalinta 4** **Markos 2:1-12**

## Iimaanku wuu Shaqeeyaa!

Aayadahan oo ah kuwo tilmaamaya dhacdo kale oo ka dhacday Kafarna'um, waxay inoo sheegayaan dhowr waxyaalood oo muhiim ah kuna saabsan 'iimaanka'ama rumaysadka oo ah mid ka mida ereyada ugu muhiimsan Kitaabka Quduuska ah. Qof inaad rumaysad ku qabtaayi waxay ka dhigantahay inaad isku hallaynayso ruuxaas.

Haddaba, u fiirso iyadoo qisado ku bilaabmaysa **dhibaatooyin jira**. Sida ku xusan aayadda 3 waxa jira nin curyaan ah oo uu bogsiin karayo Ciise oo keli ahi. Hase yeeshee waxa jirta dhibaato ah in dad badani ay meesha ku buuqsanyihiin oo ma jirto meel Ciise loo soo marsiin karo ninkaas curyaanka ah. Waxa laga yaabaa inay haddaba kusoo food saarto xaalad adag oo ah inaad weydo shaqsi aad rabto Ciise inuu la kulmo inaad u weydo meel aad usoo mariso, amaba ay jirto dhibaato kale ood garan laadahay sidii loo xallin lahaa.

Laakiin u fiirso iyada oo dadka qaar ay leeyihiin **go'aan**. Isku day inaad malayso muuqaalka cajiibka ah ee ka muuqda aayadda 4. Markii ay dadkan afarta ahi awoodi waaween inay ninkaas curyaanka ah kasoo geliyaan kadinka guriga, waxa ay go'aansadeen inay guriga saqafkiisa sare furaan oo curyaanka halkaas kasoo ridaan (Luukos 5:19). Waxa haddaba cajiib lahaa nimankaasi jacaylka ay u qabeen saaxiibkooda bukay iyo rumaysadka ay ku qabeen in Ciise uu yahay kan bogsiin kara oonay marnaba ka labo-labaynin. Waxay diyaar u ahaayeen inay dhibaatadooda u keenaan Masiixa oo ay waydiistaan inuu la tacaalo kana saaro dhibkaas. Tani markaa haddii aad tahay Masiixi waxa ay kuu tahay tusaale weyn.

Natiijada arrintan ka dhalatay waxay ahayd **bixin**. Kaddib Ciise markuu arkay rumaysadkooda (aayadda 5), waxa uu samatabixiyay ninkii, isagoo ugu horreyn ka cafiyay denbigiisa (aayadda 5) intaas dabadeedna ka bogsiiyay xanuunkiisii (aayadaha 11-12). Culimada diintu way saxsanaayeen markay sheegeen in Ilaah oo keli ah uu denbiyada cafiyo (aayadda 7) – laakiinse arrinta aan marnaba maankooda kusoo dhicini waxay ahayd in Ciise uu ahaa Ilaah. (Yooxanaa 10:30 ayaa ka mid ah aayadaha arrintan inoo sheegaya). Waxaad markaba ogaan doontaa in nolosha Masiixiyaddu ay wadato dhibaatooyin badan iyadoo dhibaatooyinkaas qaarkoodna ay noqon karaan kuwo aan jawaab loo haynin. Marka arrintu sidan noqoto, waxa aad ku dadaashaa inaad iska horqaaddo caqabadaha kaa hor istaagi kara inaad dhibaatooyinkaaga hor dhigto Ciise Masiix adigoo ku kalsoon inuu kuu jawaabi doono oo maqli doono baryadaada rumaysadku ku dheehanyahay.

"*Sida rumaysadkiinnu yahay ha idiin noqoto*" (Matayos 9:29).

**Markos 2:13-28** **Maalinta 5**

### Ku Adkaansho

Akhrinta maanta waxay koobsanaysaa dhacdooyinka isku dhafan, laakiin dhawr waxyaalood oo muhiim ah ayaad ayaad kala dhex bixi kartaa marka aad ku adkaato nolosha Masiixinimada eed ku cusubtahay.

**Addeecitaan**. Isla markii Ciise uu u yeedhay Laawi, waa uu kacay oo raacay (aayadda 14). Muu malaysan karaynin waxa ka horreeya ee ka hor iman doona laakiinse waxa uu diyaar u ahaa inuu isku halleeyo Ciise Masiix waxkasta oo ay ku qaadatoba. Waxaynu ogsoonahay inuu Laawi (oo ahaa cashuur qaade) inuu hadiyaddiisii waxqorista uu ugu adeegay Rabbiga, isagoo qoray kitaabka ama injiilka ugu horreeya Axdiga Cusub. Adna sidoo kale waxa aad leedahay hadiyado kuu gaar ah (Efesos 4:7) ee hubi inaad ugu adeegto Ilaah hadiyadahaas uu ku siiyo.

**Mucaarad.** Culimadii iyo Farrisiyiintii waxay Ciise ku dhaleeceeyeen inuu ku dhex milmo oo ku dhex jiro dadka aan la jeclayn (aayadda 16). Jawaabta uu markaas Ciise iyaga siiyay waxay ahayd inaanu u imanin inuu u yeedho dadka isu malaynaya inay wanaagsan yihiin (aayadda 17). Haddana xertiisa waxa lagu eedeeyay inaanay soomin (aayadda 18). Ciise waxa uu markaa ugu jawaabay inta caruursku joogo inaan loo baahnayn murugo (aayadda 19). Nolosha Masiixiyadda waxa laga rabaa inay ahaato mid farxad keenta (Rooma 14:17 iyo Filiboy 4:4).

**Dhawrista.** Aayadaha 23-28 waxay ka hadlayaan dhawrista maalinta Sabtida. Waxa jiray sharciyo badan oo khuseeya dhawrista maalinta Sabtida oo dadka Yuhuudda ahi dhaqan u lahaayeen, qaarkoodna waxayba ahaayeen kuwo xun. Ciise waxa uu haddaba xadhiga u jaray dhammaanba dhaqammaad xun isagoo tilmaamaya in Sabtida loo sameeyay dadka (aayadda 27), laakiin u fiirso waxa uu sii raaciyay aayadda 28! Ilaah waxa uu maalin ka mida toddobaadka kuu siiyay inaad nasato ood isaga caabuddo. Eeg tusaalaha Masiixa ee ka muuqanaya Luukos 4:16, kaddibna u fiirso amarka Ilaah ku bixiyay Cibraaniyada 10:25. Waxa lagaa rabaa inaad ku biirto kaniisad ood sida Ilaah kaa rabo u caabuddo isaga.

"*Xusuuso maalinta sabtida, inaad qoduus ka dhigto*" (Baxniintii 20:8)

**Maalinta 6** **Markos 3:1-19**

### Mucaaradid mise Taageerid?

Aayaadahani waxay ka hadlayaan labo kooxood fikirkooda ku aaddan Ciise Masiix.

Ugu horrayn, waxa jiray kuwo isaga kasoo horjeeda oo **mucaarad ku ah**. Aayadda 2 waxaynu ka arkaynaa inay jireen dad goobta wax lagu caabudo aan u tegin inay Ilaah ku caabudaan balse u tegay inay arkaan Ciise si ay u helaan waxay ugu eedeeyaan, wayna xanaaqeen markii iyaga Ciise ka adkaaday (aayadda 4) oo waxay bilaabeen inay abaabulaan qorshe ay isaga ku dilaan (aayadda 6). Iyadoo ay caddaan tahay inuu yahay

Wiilka Ilaah oonu shaki ku jirin (aayadaha 7-11) ayay haddana iyagu u ban baxeen inay kasoo horjeestaan. Maanta waxa jira dad badan oo mucaarada Masiixa iyo waxbaristiisa iyagoon xitaa tijaabinin oon eegin waxay tahay. Waxa ku filnaan lahayd oo keliya inay eegaan oo la tashadaan Sabuurka 34:8, waanay garan lahaayeen xaqiiqada, sida aad adba u ogtahay in Rabbigu uu wanaagsan yahay.

Kooxda labaad (sida aan ka arkayno aayadaha 13-19) waxa ka hadlayaan xertiisa oo isaga **taageersanaa**. Ciise waxa uu doortay dadkan tirada yar isagoo siiyay awood ay wax ku wacdiyaan (aayadda 14), iyo awood gaar ah si ay ugu adeegsadaan shaqada loo dirsaday (aayadda 15). Laakiin ugu horraynta waxa iyaga loo doortay inay isaga la jiraan (aayadda 14). Weligood may awoodi lahayn inay u noolaadaan oo u shaqeeyaan sida ay wax u qabteen haddii ugu horrayntiiba aanay isaga jiri lahayn. Maadaama ood Masiixi tahay, waxaad haddaba ku farxi kartaa inuu Sayidku kuu doortay inaad xertiisa ka mid ahaato (eeg Yooxanaa 15:16), laakiin waxaad u baahantahay inaad xasuusato in tani ay masuuliyad weyn nolol maalmeedkaaga ku tahay. Maalin kasta waa inaad ku qaadato isaga la socoshadiisa meelkasta ood joogtaba sidii xertuba ay u sameeyeen sida ka muuqata Falimaha Rasuullada 4:13! Hadiyadahaaga midkoodna saamayn kuma yeelanayso dadka kale noloshooda haddii aanay noloshaadu ku salaysnayn la socoshada Masiixa.

"*Ninna laba sayid uma shaqayn karo... Uma wada shaqayn kartaan Ilaah iyo maal*" (Matayos 6:24).

**Markos 3:2035** **Maalinta 7**

**Tijaabada Muhiimka ah**

Qaybta ugu horraysa akhrina maantu waxay la tacaalaysaa si qaldan oo wax loo fahmo, waana wax ay tahay inaad ku waajahdo nolosha Masiixiyadda. Qaybta labaadna waxay sheegaysaa sida aad ku tijaabin karta xaqiiqada iimaankaaga.

**Diidista shuqullada Eebbe**. Dad badan ayaa si qaldan u fahmay Ciise. Kuwa ka mida dadkii isaga yaqaannay waxay ku tilmaameen isaga waalli (aayadda 21). Kuwo kale iyana waxay xitaa ku eedeeyeen inuu adeegsanayo awood shaydaan oo mucjisooyinkiisa uu ku sameeyo (aayadda 22). Ciise kuwan iyaga ah waxa uu siiyay jawaab fudud balse ay ka wareereen (aayadaha 23-27) – waxa uu waydiiyay sida ay ay awoodda shaydaanku iyadu isu jebinayso ee isaga adkaanayso? Kadib waxa uu iyaga uga digay inay wax xun oo denbiya tahay shuqullada Eebbe oo lagu tilmaamo inay yihiin shuqullo shaydaan, waana iyadoo la iska diidayo in la addeeco maragfurka Ruuxa Quduuska ah ee khuseeya in Ciise Masiix uu yahay Wiilka Eebbe (aayadaha 28-30). Waxa laga yaabaa inaad la kulanto dad sheegaya in iimaankaaga aanay waxba ka jirin ama uu bidco yahay markaa jawaabtaadu maaha inay noqoto inaad iyaga dib u weerarto, balse waa inaad garawsato in noloshaada oo dhammi ay ka marag kacayso caqiidadaada iyo waxaad rumaysan tahay. Waxa jirta hees carruurta loo qaado oo tidhaahda 'Inuu Ciise Masiix wax badbaadin karo waxaad ku muujin kartaa qaab dhaqankaaga iyo dabeecaddaada'!

**Doonista Eebbe oo la yeelo.** Dhacdo yar oo fudud (aayadaha 31-32), ayuu Ciise ku bixiyay cashar aad u xooggan, waana xaqiiqada ah sida xidhiidhka aan isaga la leenahay ay uga tarjumayso doonista Eebbe (aayadda 35). Masiixi haddaad tahay waxaad ka mid tahay qoyska Eebbe (Yooxanaa 1:12 iyo Galaatiya 3:26). Waxaad haddaba ku dadaashaa noloshaada qayb waloo ka mida inaad ku muujiso nolosha aad kaga mid tahay qoyska Ilaah! Qaab nololeedkaagu waa inuu ka markhaati furo nimcada Ilaah qalbigaaga ku shubay. U fiirso waxa Daa'uud uu ku yidhi Sabuurka 40:8. Haddii si daacadnimo leh aad uga maragfuri karto waxa aad rumaysantahay, waxaad haysataa asaaska adag ee saxda ah ee nolosha Masiixiyadda oo hor istaagi karta dhaleecayn kasta oo lagaala hor yimaaddo.

**"***Kii qaynuunnadayda haysta oo xajiya, waa kaas kan i jecel***"**(Yooxanaa 14:21).

**Maalinta 8** **Markos 4:1-20**

## Ereyga Maqalkiisa

Waxa jiray masaal lagu tilmaamay inuu yahay 'qiso adduun oo wadata macne samaawi ah'. Aayadaha 3-9 waxay inoo sheegayaan mid ka mida masaallada Ciise oo ah kuwa ugu wanaagsan marka la eego Kitaabka Quduuska ah, aayadaha 14-20 waxa uu ku sharraxayaa macnaha misaalkan. Waxa uu sheegayaa afar siyaabood oo ay dadku u maqlaan ereyga (aayadda 14), waa marka laga hadlayo waxbariska Kitaabka Quduuska ah ee.

**Kan wixiisu dayacan yihiin** (aayadaha 4,15). Ereyga Ilaah dadka sidan ah saamayn yar ayuu ku leeyahay oo noloshooda kuma xididaysan markabana wuu baaba'ayaa (Sabuurka 95:7-8).

**Kan sugnaanshaha aan lahayn** (aayadaha 5-6, 16-17). Kuwani waxay ereyga ku aqbalaan si farxad leh laakiinse noloshooda kuma dabaqaan ereyga Eebbe. Natiijadu waxa weeyi markaas in ereygii Eebbe aanu noloshooda ku xoogaysan oo marka dhibaatada iyo cadaadisku ku yimaaddo way kala yaacaan (aayadda 17).

**Kan mashquulsan** (aayadaha 7, 18-19). Kuwani si fiican bay u maqleen ereyga laakiinse waxay ku mashquuleen hawlaha kale ee dunida oo waxa ay natiijadoodu noqotay mid aan midho dhal ahayn (aayadda 19).

**Kan taxadarka leh** (aayadaha 8,20). Kuwan waxa lagu tilmaamay inay yihiin carrada wanaagsan (aayadda 20), waana dhul ereyga Ilaah si taxadar ku jiro loogu beeray, natiijadiisuna waa mid weyn oo midho dhal leh.

Casharka middan laga baran karo waxa uu Ciise kusoo koobay aayadda 9, waxaana weeyi isaga oo dadka ugu yeedhaya inay feejignaan u yeeshaan ereyga Eebbe. Waxaad isku xidhaa ereyga 'waxa' ee uu adeegsaday Markos 4:24 iyo tan ah 'sida' ee uu adeegsaday Luukos 8:18. Haddaad rabto inaad noqoto mid Ilaah xidhiidh fiican la yeesha waa inaad si joogto ah u barato Kitaabka Quduuska ah adigoo Ilaah baryaya isla markaasna xiiso weyn iyo harraad u qaba. Go'aanso inaad ereyga Eebbe si feejignaan leh u akhrido marwalba waxaanad Ilaah ka baridaa inuu ereyga Eebbe noloshaada miro kasoo saaro.

'*Waxaan eraygaagii qalbigayga ugu kaydsaday Si aanan kuugu dembaabin*' (Sabuur 119:11).

**Markos 4:21-34** **Maalint 9**

## . Kuwa Kale

Maadaama ood Masiixi tahay, waxa lagaa rabaa inaad ka fikirto sidii aad dadka kale ula wadaagi lahayd injiilka. Akhrinta ereyga maanta waxa uu inoo sheegayaa labo siyaabood oo arrintan loo qaban karo.

**Ha muuqato**! Aayadda 21 waxa la inoogu sheeg xernimo qarsoodi ahi inaanay suurto gal ahayn. Qofna ma shido shamac ama laambad oo ma dhigo miiska hoostiisa. Sidoo kale adna maaha inaad ka xishooto injiilka adigoo u marag furaya Masiixa. Sidoo kale u fiirso aayadda 25 oo sheegaysa hadiyadda oon la isticmaalini inay ka dhigantahay iyadoo kaa luntay. Si feejignaan leh u akhri waxyaalahan sida uu Ciise ugaga hadlay Matayos 5:14-16 una fiirso aayad kasta dhammaadeedu waxa uu leeyahay. Shamaca ama laanbadda looma shido inay iyadu is iftiimiso balse waxa loo shidaa inay iftiimiso meel kale. Noloshaadu markaas waa inay iftiin iyo ku dayasho u noqoto dadka kale si ay iyaguna Ilaah ugu yimaaddaan.

**Ha korto**! Aayadaha 26-29 iyo 30-34, Ciise waxa uu ku bixinayaa labo masaal oo ku saabsan koritaanka boqortooyada Ilaah. Kan koobaad waxa uu tusinayaa in koritaanku uu yahay mid aan muuqanin oo qarsoodi ah. Kan labaadna waxa uu muujinayaa natiijada weyn ee koritaankan qarsoodiga ah – midho yar ayaa noqonaya geed weyn. Sidoo kale haddii aad rumaysadkaaga ku nafaqayso ood ku koriso baryada Ilaah iyo akhrinta Kitaabka Quduuska ah iyo caabudaad joogto ah, waxa aad ka yaabi doontaa saamaynta ay arrintaasi ku yeelato dadka kale ee kugu hareeraysan. Taasi waxa ay adigana kuu ahaan doontaa dhiirrigelin cajiib ah. Laakiin hadiyo jeer xasuusnow sida ay wax u kala horreeyaan waayo inta aanay imanin midho muuqdaa waxa ka horreeya oo hortood yimaadda xidid qarsoon oon muuqanin oo  ku aasan dhulka, isaga oo ka dhigan waxa Ilaah siiyay noloshaada ruuxiga ah caafimaad qabkeeda iyo xooggeedaba. Waxyaalahan ood iska indho-tirtaa ma dhaawacayso oo keliya noloshaada, balse sidoo kale waxay turaanturo u gaysanaysaa dadka kale noloshooda. Wakhti yar ku qaado inaad akhrio Sabuurka 1 – waxaanad u fiirsataa xidhiidhka muuqda ee u dhexeeya aayadda 3 iyo aayadda 4.

"*U socda sida carruurta nuurka*" (Efesos 5:8).

**Maalinta 10** **Markos 4:35-41**

## Amarka Masiixa (1)

Waa aayado kooban oo ka waramaya qiso ina bari karta waxyaalo badan waxaana lagusoo koobi karaa ereyadan.

**Dhibaato** (aayadda 37). Xertu badda Galilee si fiican ayay u yaqaanneen laakiinse iyagoo biyo ay yaqaanneen ka tallaabaya ayaa dhibaato ku timid, dhibaatadaasiina waxa ay khatar gelisay doontii ay saarnaayeen oo ku sigatay inay qarqoonto. Haddaad eegto Yooxanaa 16:33 waxaad arkaysaa sida taxaddarku ku jiro ee Ciise uu xertiisa uga digay duufaanta kala duwan ee nolosha ku waajihi doonta. Yooxanaa 15:19 waxa uu ku sharaxay sababta ay hadiyo jeer arrintani ugu dhacdo Masiixiyiinta.

**Masiixa** (aayadda 38). Xertu marka ay dhibaatadu ku timid waxay markiiba garanyeen meesha ay ka raadin lahaayeen caawimaad oo hadiyo jeerna Masiixa ayaa ahaa kan

xaaladdan oo kale ka badbaadin karay. Xitaa xaaladahaas iyaga ah, waxa uu isagu muujiyay sida ay awooddiisu wax kastaba u maamuli karto. Kolosay 1:16 waxa ay inoo sheegaysaa sababta uu isagu awooddan u lahaa.

**Deganaan** (aayadda 39). U fiirso farqiga u dhexeeya xaaladda kacsanaanta ah ee lagu xusay aayadda 37 iyo tan deganaanta ah ee lagu xusay aayadda 39. Sababtu waxa weeyi Ciise oo la tacaalay arrinta. Xertu iyagu may lahayn tamar ay ku waajahaan dhibaatadaas waxaanay u malaynayeen inay qarqoomi doonaan (ayadda 38). Markii Ciise uu haddaba arrinta soo farageliyay, khatartii way dhammaatay waxaana laga yaabaa inay isku yaxyaxeen marka la eego waxa uu iyaga ku yidhi sida ku xusan aayadda 40. Nolosha Masiixiyadda haddaba waxa laga yaabaa inay kulasoo dersaan dhibaato iyo shaki miidhani oo mararka qaarna waxay u muuqan karaan waxyaalahaasi kuwo khatar badan, marka waxani kulasoo dersaan waxaad haddaba xasuusataa in Ciise uu kula jiro oo doonta kula saaranyahay (aayadda 36). Isaga ayaad hadiyo jeer weydiisan kartaa xikmad, hanuun iyo dhiirrigelin. Ilaah muu ballanqaadin in Masiixiyiintu ay ku noolaan doonaan nolol sahlan oo bilaa dhibaato ah, laakiinse waxa uu ballanqaaday inuu hadiyo jeer iyaga samatabixin doono.

*Amar oo dhan ayaa samada iyo dhulka laygu siiyey* (Matayos 28:18).

**Markos 5:1-20** **Maalinta 11**

## Amarka Masiixa (2)

Waxa laga yaabaa qaybta aad maanta akhriyayso in fahankeedu kugu adkaado ugu horraynta, laakiinse waxa ku caawin kara inaad diiradda saarto saddex waxyaalood oo ku saabsan nin isku magacaabay Liijon (aayadda 9).

Ugu horraynta, waxanynu arkaynaa in ninkan uu **jinni derderay**. Aayadaha 2-5 waxay ka hadlayaan ninkan muuqaalka laga bixiyay ee cabsida leh isaga oo ku noolaa xabaalaha u dhow Badda Galilee. Si rasmi ah u garan mayno xanuunka uu ninkani qabay, laakiin waxa la inoo sheegay inuu ahaa nin dhibaato haysato oo aad u derderan oon cidina xakamayn karin oo xitaa naftiisa baabi’inaya (aayadaha 3-5). Haddaba, ha sahashanin awoodaha shaydaanka, Masiixiguna waxa laga rabaa inuu waajaho dhibaatooyinka ruuxiga ah ee ka jira dunidan. U fiirso waxyaalaha uu rasuul Bawlos kaga hadlayo aayadaha Efesos 6:12.

Marka labaad, waxaynu arkaynaa in ninkii **la badbaadiyay**. Farqi wayn ayaa u dhaxaysa xaaladda ninkani ku sugnaa marka aan eegno aayadda 15! Markale xaaladdan ah rajo la’aanta (eeg aayadda 4) waxa bedeshay awoodda Sayid Ciise Masiix. U fiirso in ruuxdii jinniyadu ay aqoonsatay amarka iyo awoodda Masiixa (aayadaha 7,12). Markii jinniyadii la saaray, Liijon xaaladiisu way degtay. Markii hore xaaladdiisu waxa ay ku sugnayd waalli hadda se waxa u soo laabtay miyirkiisii iyo degenaantiisii.

Ugu danbaynta, waxaan arkaynaa inuu noqday **xerow**. Ninkan hadda caafimaadkiisii usoo noqday, waxa uu doonay inuu Ciise raaco (aayadda 18), laakiin Ciise waxa uu isaga ku amray inuu ku laabto dadkiisii oo uu uga sheekeeyo waxa isaga loo sameeyay (aayadda 19). U fiirso iyadoo markiiba uu addeecitaan la yimid oo injiilku uu ku faafay toban magaalo oo halkaas ka ag dhowaa (macnaha Dekabolis ee aayadda 20) arrintaas aawadeed. Qofku inuu rumaysad la yimid caddaynta ugu weyn ee ka marag kacaysaayi waa noloshiisa oo is beddesha waxaana weeyi sida ugu fiican ee qofkaasi ugu markhaati furi

karo dadka isaga ka ag-dhow. Noloshaada adiga weli is beddelkaasi ma ka muuqday oo dadka kaa ag-dhowi ma dareemeen?

"*Sidaas daraaddeed haddii qof Masiix ku jiro waa abuur cusub, oo waxyaalihii hore way idlaadeen*" (2 Korintos 5:17).

**Maalinta 12** **Markos 5:21-43**

**Amarka Masiixa (3)**

Aayadahan waxa aynu sidoo kale ku arkaynaa awoodda iyo amarka Sayid Ciise Masiix sida uu u shaqaynayo.

Meesha ugu horraysa waxaynu ku arkaynaa sida uu **cudur oo dhan uga amar sarreeyo** ee uu u bogsiin karo (aayadaha 25-34). Waxa jirtay haweenay qabtay dhiigbax socday muddo dhan labo iyo toban sannadood manuu jirin dhaqtar daaweyn karay iyada (aayadda 25). Iyadoo xaaladdaas quusta ah ku jirtay ayay Ciise kaalmo weydiisatay. Rumaysadkeedu waxa uu u suurto geliyay inay aaminto in haddii ay dharkiisa taabato ay bogsoon doonto (aayadda 28), Ciisena waxa uu iyada ku abaal mariyay ereyadiisa awoodda badan ee bogsiin kara xanuun kasta: "rumaysadkaaga ayaa ku bogsiiyey" (aayadda 34). Ciise waxa uu awoodaa inuu la tacaalo dhibaatooyinka ku dhibaya ee sannado badan aad la liidatay, taasina waxa ay imanaysaa marka aad isaga rumaysato.

Marka labaad, waxaynu arkaynaa in Ciise uu xitaa ka **adagyahay dhimashada** (aayadaha 35-43). Ciise waxa uu kusii socday guriga nin la odhan jiray Yayros oo gabadhiisa yare e labo iyo toban jirka ahaydi ay sakaraad ahayd (aayadaha 22-24). Waxa haddaba imika yimid ninkan shaqaalihiisii oo ku wargeliyay in gabadhiisii yarayd ay dhimatay isla markaasna aan loo baahnayn inuu Ciise rabshad ku furo (aayadda 35). Ciise waxa uu markaas ku jawaabay, rumaysad lahow oo ha cabsan (aayadda 36) oo markii uu gurigiisii ku laabtayna waxa uu arkay sida Ciise xitaa uga awood sarreeyo dhimashada (aayadaha 41-42). Waxa uu gabadhii yarayd waydiiyay oo ku amray inay samayso waxaan suurto gal ahayn oo ah inay dhimashada ka sarakacdo. Haddaba, waxkasta oo Ciise kugu amro waxaad ogaataa in awooddiisu kula jirto oo kuu suurto gelinayso hawshaas fulinteeda. Si kastaba ha ahaatee, u fiirso sida uu Ciise u danaynayo wax kasta oo khuseeya nolol maalmeedka qofka (aayadda 43). Haddaynu Masiixiyiin nahay waxa dhiirrigelin weyn inoo ah inaynaan nolosha ku ahayn keli, balse aynu haysano Badbaadiyo weyn oo ah Ciise Masiix oo danaynaya waxkasta oo la xidhiidha nolol maalmeedkeenna iyo baahiyeheenna shaqsi ahaaneed. Waxa kaloo intaas dheer, in Kitaabka Quduuska ahi inoo sheegayo in dhimashadu ay dadka Masiixiyiinta ah uga dhigantahay hurdo keliya maadaama oo ay iman doonto maalin uu Ilaah iyaga sarakicin doono oo ay heli doonaan nolol weligeed ah (isla xidhiidhi aayadda 39 iyo 1 Tesalonika 4:14).

"*Wax waluba waa u suurtoobaan Ilaah*" (Matayos 19:26).

**Markos 6:1-13** **Maalinta 13**

**Qiimaha Diidmada**

Akhrinta maantu waxay u qaybsantahay labo qaybood.

Tan ugu horraysa, oo ah aayadaha 1-6, waxaynu ka arkaynaa **awood ama amar la diiday**. U fiirso ereyada cajiibka leh ee ka muuqanaya bilowga aayadda 5. Waa maxay sababta ay awoodda Ciise ee saddexdii cisho ee u danbaysay aynu soo arkaynay aanay halkaas uga samaynin wax mucjisooyin ah? jawaabta arrintaas waxaynu ka arkaynaa aayadda 6, waana rumaysad la'aantooda. Tani waa natiijada kharriban ee ka dhalanaysa diidmada in Ilaah la rumaysto. Masiixu waxa uu lahaa awood uu ku badbaadiyo dadka xanuunsan, kuwa murugaysan iyo denbigaba, laakiin dadkiisii (aayadda 1) waa ay diideen inay isaga rumaystaan. (eeg Yooxanaa 1:11, oo sheegaysa in Yuhuudda badankoodii diideen isaga). Dadkii reer Naseret isaga si fiican ayay u yaqaanneen – laakiin ma waxay ka hinaasaysnaayeen quduusnaantiisa iyo awooddiisa? Waxay ahayd inay qirtaan waxyaalaha cajiibka ah ee uu sameeyay (aayadda 2). Haddaba awoodda Ilaah ha ku koobin dadka kale noloshooda, sidoo kalena weligaa ha diidin inta aad nooshahay.

Qaybta labaad waxa aan ku arkaynaa **awood ama amar la helay**. Aayadda 7 waxaynu ka arkaynaa in Ciise markii uu xertiisa u yeedhay inuu siiyay awood ay ku bixiyaan jinniyada wasakhaysan. Xertu haddaba arrintaas iyada ah kamay cudurdaaranin oo may ka marmarsoonin farriinta Eebbe laakiin si sharaf leh oo amar ku jiro ayay ugasoo baxeen. Ciise waxa uu ogaa in dadka qaarkood ay farriintu ku noqon doontay gaf (aayadda 11), sidii ay ugu ahayd markii uu farriinta ku hadlayba (aayadda 3). Si kastaba ha ahaatee, farriinta aayadda 12 waxa ay ahayd in la gudbiyo oo lagu wacdiyo, qiimaha ay doontaba ha ku kacdo ee. Matayos 24:14 waxay inoo sheegaysaa in innagana ay maanta taasu tahay masuuliyad ina saaran. Sidoo kale u fiirso sida ay xertu nolol maalmeedkooda oo dhan ugu tiirsanaayeen Ilaah (aayadaha 8-9). Weligaa ha ka cabsan inaad ka qayb qaadato shaqada Masiixiyadda, markastana diyaar u ahaw inaad samayso waxkasta oo Ilaah kaa rabo inaad samayso, adigoo ogsoon inuu ku siin doono waxkastood rabto markaad isaga addeecdo.

"*Anigu injiilka ka xishoon maayo*" (Rooma 1:16).

**Maalinta 14** **Markos 6:14-29**

## Qiimaha Denbiga

Aayadahani waxa ay ka hadlayaan waxyaalo khuseeya Herodos Antibas oo ahaa xaakinkii qayb ka mid ah Galiili. Waxa ay aayadahani innaga caawinayaan wax ku saabsan sida uu denbigu khatarta u yahay. Waxa aynu halkan ka daalacanaynaa saddex waxyaalood oo ku saabsan boqorkan sharlowga ah.

**Caasinimadiisa**. Waxa uu jebiyay qaynuunkii Ilaah isagoo guursaday naagtii walaalkii (aayadda 17) waxaanu kasoo horjeestay oo diiday digniintii uu siiyay Yooxanaa Baabtisaha oo ahaa adeegaha Ilaah (aayadda 18). Inkastoo aayadda 20 ay tusinayso inuu xoogaa ixtiraamayay Yooxanaa Baabtiisaha, waxa ay tani xoogaa yar taabanaysaa uun xaqiiqada. Isagoo maalin iska raaxaysanaya oo xaflad jooga ayuu sameeyay ballanqaad aan laga fiirsanin (aayadda 13) taas oo sabab u noqotay inuu waafaqo dilka naxariis-darrada ah ee Yooxannaa.

**Murugadiisii**. Aayadda 26 waxa aynu ka arkaynaa in Herodos aanu arrintaas ku faraxsanayn. Laakiin waxa uu dhinaca kale ku faanayay inuu qabto waxa saxda ula muuqday, oo kibirkiisiina waxa uu ku qasbay inuu amro dilka Yooxanaa (aayadda 27). Maaha wax lala yaabo in Kitaabka Quduuska ahi sheegay in 'jidka khaayinnadu waa xun

yahay' (Maahmaahyadii 13:15). Haddaba middan u qaado inay ka digayso in denbigu uu badanaa sii horseedo denbi kale!

**Denbiilanimadiisa**. Waxyaalahan oo dhami waxay ahaayeen kuwo dhacay xilli hore, laakiin Herodos damiirkiisu wuu shaqaynayay markuu maqlay waxyaalaha cajiibka ah ee Ciise samaynayo waxaanu ka baqayay in si mucjiso leh uu Yooxanaa Baabtiisuhu dhimashada ugasoo sarakacay oo isaga balaayo ku keeno (aayadaha 14-16). Sida Kitaabka Quduuska ahi ina xasuusinayo, 'Kuwa sharka ah nabadu uma jirto' (Ishacyaah 48:22). Wakhtiyar gudihiis, Herodos waxa uu ku galay denbi kale oo kii hore kasii xun (eeg Luukos 23:11). Qisadiisu waxa weeyi mid ina xasuusinaysa sida uu denbigu u kharribanyahay. Mar haddaad tahay Masiixi, maaha inaad si yar oo macno-darro ah u denbaabto waayo denbigu waxa uu kharribayaa marag-furkaaga sidoo kalena waxa uu kaala tegayaa farxadda, kalsoonida iyo kartida iyo saamaynta. Masiibada intaas kasii waynina waxa weeyi, waxa uu jebinaya weheshigii aad la lahayd Ilaah isagoo kugu sababaya murugo. Masiixi kastaa waa inuu ka digtoonaada oo ogaado qiimaha denbigu ku kacayo.

**"***waxaan waxyaalahan idiinku soo qorayaa si aydnaan u dembaabin***"** (I Yooxanaa 2:1).

**Markos 6:30-44** **Maalinta 15**

## Kibista Nolosha

Qaybtan ka midka ah Injiilka Markos waxaynu ka arkaynaa iyadoo Sayid Ciise Masiix uu ku danaynayo qaybkasta oo khusaysa nolosheena iyo jiritaankeenna – jidh ahaan, maskax ahaan, iyo ruuxi ahaanba – waxaynuna arkaynaa isaga oo innaga haqab-tiraya baahiyeheenna oo dhan.

**Jidh ahaan**. U fiirso aayadaha 31-32 sida uu Ciise u aqoonsaday muhiimadda nasashada. Ilaah isaga ayaa jidhkeenna abuuray waxaanu ogsoonyahay waxaynu u baahanay oo dhan. Kaama rabo inaad wakhtigaaga oo dhan ku dhamaysato iska hor iyo daba socod (aayadda 31). Laakiin sidoo kalena kaama rabo inaad noqoto caajis – u fiirso iyadoo xerta loo sheegay inay xoogaa nastaan (aayadda 31). In la isu dheellitiro shaqada iyo nasashadu waxay muhiim u tahay ku koritaanka Masiixiyadda. Ilaah weydiiso inuu kaa caawiyo arrintan si aad uga fogaato inaad caajis noqoto ama culays isku saarto shaqada ood wakhtigaaga oo dhan shaqo ku dhammaysato.

**Maskax ahaan**. Aayadda 34 waxaynu ka arkaynaa iyadoo Ciise uu bilaabay inuu iyaga baro waxyaalo badan. Dadka qaar ayaa u malaynaya in Masiixiyaddu ay u ahaatay dadka aan caqliga badan lahayn iyo kuwa jaahilka ah, laakiin xaqiiqadu waxa weeyi in Ciise uu

ahaa macallinka ugu weyn ee dunida soo mara. Eeg waxyaalaha ay isaga dadku ka yidhaahdeen ee ku sugan Matayos 7:28-29 iyo 13:54, sidoo kalena eeg sida ay kuwo ka mid ahaa culimada diinta ee wakhtigiisii joogay ay uga jawaab celiyeen waxbaristiisa sida ku sugan Luukos 2:46-47! Kitaabka Quduuska ahi waxa uu leeyahay, 'Rabbiga kacabsashadiisu waa bilowga xigmadda' (Sabuurka 111:10).

**Ruuxi ahaan**. Quudinta ama cunto siintii shanta kun ee qof waxa ay ahayd tusaale kale oo ka mida mucjisooyinkii iyo yaababkii uu Sayid Ciise Masiix samaynayay. Laakiin halkan waxa laga baran karaa cashar kale. Mucjisadani waxa ay sidoo kale ku sugantahay Injiilka Yooxanaa, waxaanay inoo sheegaysaa in Ciise uu sheegay inuu isagu yahay 'kibista nolosha' (Yooxanaa 6:35) iyo in nolosha Masiixiyaddu ay isaga ku qotonto (aayadaha 56-57). Sida aanu jidhkeennu u noolaan karin cunto la'aan oo kale ayaanu ruuxeennuna u noolaan karin Masiixa la'aantiisa. Casharka aynu markaa halkan ka baranaynaa waa mid cad oo muuqda, waxaana weeyi: inaynu si joogto hadiyo jeer ruuxdeenna ugu xidhno Masiixa si ay middaasi jidhkeenna ugu noqoto nafaqo.

'*Aniga ma aha kan nooli, laakiin Masiix ayaa igu dhex nool*' (Galaatiya 2:20)

**Maalinta 16** **Markos 6:45-56**

## Ilaah oo Inala Jira

Dhacdadan ku sugan Markos waxay inoo sheegaysaa saddex waxyaalood oo caqabad innagu noqonaya sidoo kalena dhiirrigelin inoo ah.

**Tukashada Masiixa**. Ciise ka hor intaanu buurta u fuulay inuu tukado waxa uu iska diray dadkii badnaa iyo xertiiba (aayadaha 45-46). Tukashada dhabta ahi waa mid u baahan wixii carqalad keenaya oo dhan inay ka fogaato. Si aad markaas middan u hesho waxa aad u baahantahay inaad hesho wakhtiga iyo goobta ugu fiican eed si joogto ah maalintii ugu tukan karto uguna akhrin karto Kitaabka Quduuska ah. Xitaa daalka iyo soo jeedka habeenkii xilliga danbe midkoodna Ciise kamay hor istaagin inuu wakhtigan muhiimka ah la qaato Aabbaha samada ku jira. Xerta waxa markaas iyaga heshay dabayl xooggan oo ka kacday badda Galiili. Ciisena waxa uu arkay iyagoo dhibaato ku jira (aayadda 48), laakiin waxa uu tijaabinayay iyaga rumaysadkooda iyagoo saacado dhibaatoonayay. Xitaa markii uu iyaga xaggooda usoo socday waxa uu u muuqday sidii mid iyaga dhaafaya. Xertuna way baqanayeen (aayadaha 49-50).

**Joogitaanka Masiixa**. Way arkeen isaga (aayadda 50), laakiin midkoodna ma garanin inuu isagii yahay! Xaaladdan oo kale waxa ay dhacday markale sida aynu ka arkayno

Yooxanaa 20:19-20. Ballanqaadka Ilaah waxa weeyi inaanu weligaa ku dayrin doonin (Yashuuca 1:5). In la aqoonsado Ilaah inuu inala jiro waxa ay ina siinaysaa deganaansho xitaa marka lagu jiro xilliga adag.

**Awoodda Masiixa.** Aayadahani waxay tusinayaan Ciise Masiix oo awooddiisa u adeegsaday xerta cabsidooda (aayadda 50) iyo duufaanta (aayadda 51) iyo sidoo kale cudurro badan bogsiintooda (aayadaha 55-56). Dhammaan waxyaalahani waxa ay markaas ina xasuusinayaan in maalin maalmaha ka mid ah uu cadaawayaashiisa oo dhan hoos keeni doono cagihiisa (I Korintos 15:25).

Masiixi marka aad tahay waxa aad mararka qaar arkaysaa iyadoo noloshu ay ka dhigantahay sida dabayl xooggan oo kaa hor imanaysa (I Yooxanaa 5:19 waxay kuu sheegaysaa sababta) laakiin waxkasta Sayidka ayaad baryo ku hordhigi kartaa adigoo kalsooni ku qabaya joogitaanka Masiixa oo isku hallaynaya awooddiisa. Masiixiyiintu waxa ay haystaan oo ay kaga adkaan karaan dhibaatooyinka lasoo dersa.

‘*Haddii Ilaah inala gees yahay, yaa inaga gees ah*?’ (Rooma 8:31).

**Markos 7:1-23** **Maalinta 17**

## Dhaqanka iyo Xaqiiqada

Aayadahan waxa aynu ka arkaynaa labo arrimood oo lagu kala saaray. Marka aan si qoto dheer u eegnana waxa aan ka baranaynaa cashar muhiim ah.

**Caadooyinka ama dhaqamada muuqda**. Farrisiintu (Yuhuud xagjir ah oo dhaqanka ku dheggan) waxa ay lahaayeen caadooyin badan iyo dhaqamo wax kasta u kala saarayay xalaal iyo xaaraan. Waxyaalahanina kamay mid ahayn ‘amarradii Ilaah’ (aayadda 8) laakiin waxay ahaayeen uun ‘dhaqan’ (aayadaha 3, 5, 9, 13) ama ‘ay dejiyeen dadku’ (aayadda 7). Nasiib darro, Farrisiintu waxyaalahan ayay isku taxallujin jireen oo waxkasta ka hor marin jireen ilaa ay xitaa ka hor mariyeen ereyga Ilaah (aayadda 8). Iyaga diintu waxa ay uga dhigneyd raacitaanka iyo fulinta sharciyadaas, haddii qofku uu Ilaah jecelayahy iyo haddii kaleba. Sidee ayay waxyaalahani markaa uga duwanyihiin sida uu Ciise kaga hadlay sharciga Ilaah waxa khuseeya ee ku sugan Matayos 22:37-40!

**Xaqiiqada gudaha**. Aayadaha 14-23 waxay si cad inoo tusinayaan fahanka khuseeya xaqiiqada nolosha iyagoo inoo sheegaya meesha uu denbiga xididka ku leeyahay. Denbigu waa cudur ku dhaca qalbiga ee maaha cudur ku dhaca jidhka muuqda! Erey kasta waxa ka

danbeeya fikir, sidoo kale fal kastana waxa ka danbeeya qaab fikir. Qofka waxa uurkiisa ku jira ayaa dabeecaddiisa ka muuqda. Waxa aad samaysaa ama ku tallaabsataa waxa ay tusinaysaa cidda aad tahay! Eeg liiska denbiyada ee ay dhigayaan aayadaha 21-22, una fiirso iyagoo koobsanaya denbiyada fikirka, ereyada iyo camalka. Ciise waxa uu sheegayaa in waxyaalahan oo dhami kasoo baxaan gudaha (aayadda 23). Si kale haddaan u sheegno, sida uu qofku u fikiro ama u hadlo ee uu u dhaqmo ayaa ah mid isaga ka dhigi karta nijaas, waxaanay caddayn u tahay qofkaasi cidda uu yahay. La yaab markaas ma laha in Kitaabku uu yidhaahdo ‘Digtoonaan qalbigaaga u dhawr, Waayo, isagay noloshu ka soo baxdaaye’ (Maahmaahyadii 4:23). Weligaa tayada noloshaada Masiixiyadda ha ku xukumin falalka muuqda ee diinta, balse qalbigaaga marwalba itixaan oo hubi inaad raadinayo inaad ku noolaato ammaanta Ilaah.

‘*dadku wuxuu fiiriyaa muuqashada dusha, Rabbiguse qalbiguu fiiriyaa*’ (I Samuu’eel 16:7).

**Maalinta 18** **Markos 7:24-37**

**Warka wanaagsan!**

Aayadahan xiisaha badan waxa aan ka baranaynaa wax ku saabsan labo mawduuc oo khuseeya warka wanaagsan isla markaana si wada jira loogu keenay Axdiga Cusub.

**Dadka aan Yuhuudda ahayn**. Ciise waxa uu joogay markan dhulka dadka aan Yuhuudda ahayn iyadoo ay u muuqato inuu halkaas u aaday nasasho (aayadda 24). Qofka caadiga ah ee Yuhuudiga ahi waxba kumuu darsan jirin qof aan Yuhuudi ahayn (barbardhig Yooxanaa 4:9) sidoo kalena waxay rumaysnaayeen inaan qofka aan Yuhuudiga ahayni aanu weligiisba galaynin boqortooyada Ilaah. Tani waa sababta uu Ciise naagtii aan Yuhuudiyadda ahayni markii ay waydiisatay inuu gabadheeda u bogsiiyay uu ugu jawaabay hadal aan caadi ahayn sida ka muuqata aayadda 27. ‘Carruurta’ marka laga hadlayo waxa loogala jeedaa Yuhuudda, ‘eeyahana’ waxa laga wadaa dadka aan Yuhuudda ahayn. Ciise waxa uu markaas arrintan u adeegsanayay weedhahan tijaabinta iimaanka haweenaydan. Waxa ay markaas Ciise ugu jawaabtay in xitaa eeyuhu ay heli karaan waxay cunaan (aayadda 28). Ciisena markiiba waxa uu qadariyay rumaysadkeeda oo waxa uu bogsiiyay gabadheedii (aayadda 29).

**Injiilka**. Casharka weyn ee halkan laga baran karo (ee koobsanaya bogsiinta ninkii dhegaha la'aa, aayadaha 32-35) waxa weeyi iyadoo Ciise uu meesha ka saaray farqiga u dhexeeya cuntada xalaasha ah iyo tan nijaasta ah (eeg akhrintii shalay), sidoo kalena waxa uu meesha ka saaray farqiga u dhexeeya uYuhuudda iyo kuwa aan Yuhuudda ahayn. Eeg sida uu arrintan Rasuul Bawlos ugaga hadlay Galaatiya 3:26-28. Yuhuuddu waxay ahaayeen dadka Ilaah doortay laakiin waxa laga rabay inay warka wanaagsan ee Ciise Masiix dunida oo dhan gaadhsiiyaan oonay iyaga oo keli ahi isku koobin. Ma jiraan asal iyo cirqi iyo waxkasta oo kale oo qofka ka hor istaagaya inuu u yimaaddo Masiixa. Masiixi markaad tahay – adoo ka mida dadka Ilaah (Galaatiya 6:16) – waxa laguu doortay inaad ka qaybqaadato warka wanaagsan oo dunida oo dhan lagu baahiyo. Sidii Rasuul Bawlos, waxa lagugu aaminay oo laguu wakiishay Injiilka (I Tesaloniika 2:4). Hubi inaad masuuliyadan u qaadato si dhaba iyadoo ah doonista Ilaah kaa rabo (Markos 16:15).

'*Oo kii doonayaaba biyaha nolosha hadiyad ahaan ha u qaato*' (Muujintii 22:17).

**Markos 8:1-21** **Maalinta 19**

**Danayn**

Maalmo ka hor waxaynu soo akhrinay mucjisadii quudinta shanta kun ee qof. Imikana Markos waxa uu inoo sheegayaa dhacdo kale oo middaas la mid ah. Dhacdadan iyada ah waxa aynu markaas ka arkaynaa dad danaynaya waxyaalo kala duwan.

**Danaynta Sayidka**. Aayadaha 1-3 waxa ay markale tusayaan naxariista weyn (aayadda 2) ee Ciise, iyo sida qotada dheer ee uu u danaynayo baahiyaha dadka. Matayos 9:36 ayaa ka mida meelaha badan een arrintan ka arkayno. Xertu waxay haysteen oo keliya toddoba kibisood iyo dhawr kalluuna oo yaryar (aayadaha 6-7), laakiin markii Ciise loo dhiibay waa uu badiyay oo wuxuu ku quudiyay 4000 qof. Siday doonaanba ha kuula yaraadaanee, Ilaah waxa uu wax weyn ka dhigi karaa hadiyadahaaga haddii aad isaga hordhigto!

**Danaynta Farrisiinta.** Waxa aynu sidan ka akhrin karnaa aayadaha 11-13. Iyagu waxa ay rabeen calaamo ka timaadda samada oo ku qancin karta in Ciise uu ka yimid xagga Ilaah. Laakiinse calaamooyinka isugu jira quudinta iyo bogsiinta iyo waxkasta oo idil oo uu

sameeyay iyaga kumayna qancinin inay rumaysad la yimaaddaan. Waxa weeyi qalbi engegnaan kharriban. U fiirso aayadda 13 oo barbardhig Yooxanaa 8:24.

**Danayntii xerta.** Markii ay ka tallaabeen Badda Galiili ayay xertu xasuusteen inaanay qaadanin wax kibis ah oo ay illaaween (aayadda 14). Markii Ciise uu bilaabay ka hadlitaanka khamiirka Farrisiinta iyo kan Herodos (aayadda 15) ayay arrintaas aad u sii daneeyeen, waxaanay qoomameeyeen sida ay wax u dayaceen (aayadda 16). Laakiin Ciise waxa uu iyaga tusiyay inaanay u baahnayn inay ka fikiraan kibis (aayadaha 20, 21). Waxa uu isku dayayay waxay ahayd inuu iyaga uga digo khatarta labowejiilanimada (khamiirka Farrisiinta) iyo ka daba ordista dunida (khamiirka Herodos). Adigu wax ma danaynaysaa? Maaha inaad isku taxallujiso calaamooyin iyo helitaanka waxyaalaha dunida, laakiin iska ilaali oo ka digtoon labowejiilanimada iyo falalka aad samaynayso ay noqdaan kuwo aad ku danaysanayso oo keliya uun.

‘*horta doondoona boqortooyadii Ilaah iyo xaqnimadiisa, oo waxaas oo dhan waa laydinku dari doonaa*’ (Matayos 6:33).

**Maalinta 20** **Markos 8:22-9:1**

**‘Masiixa’ (1)**

Akhriska maanta Markos waxa uu ku bixinayaa saddex arrimood oo khuseeya Masiixa.

**Kan aragga soo celiya**. Aayadaha 22-26 waxa aan ku arkaynaa qiso qurux badan. U fiirso markale naxariista Ciise iyo sida uu diyaarka ugu ahaa inuu wakhti la qaato nin. Kitaabka Quduuska ahi waxa uu ina barayaa inuu ahaa kan aragga ruuxiga ah sidoo kale soo celiya. Eeg sida ku xusan Yooxanaa 11:40.

**Kan muujiya badbaadada**. Markii Ciise uu weydiiyay su’aasha muhiimka ah ee ku sugan aayadda 27, xertu waxay bixiyeen jawaabo kala duwan. Butros oo keliya ayuu ahaa kii qiray inuu isagu yahay ‘Masiixa’ (aayadda 29). Ereygan waxa uu la macno yahay ‘la subkay’ waana macnaha ereyga ‘Masiix’, oo ahaa kan ay Yuhuuddu in badan sugayeen ee jebin doonay cadawgooda isla markaasna awoodda ummadda Israa’iil soo celin doonay. Ciise markaas waxa uu muujinayaa inuu yahay Masiixa ah kan badbaadin doona dadka. Butros muu garanaynin sababta ay tahay inuu u dhinto Masiixu si uu badbaado u keeno,

sidaas darteedna, waxa ay jaahilnimadiisu ku kalliftay dhaleeceeyo arrintan iyada ah (aayadda 32). Waxa ay middanina kallifta in isaga si xun loo canaanto (aayadda 33). Ciise ereyadiisa waxa ay tusinayaan in Butros uu u hadlay sidii Shaydaanka oo kale.

**Bixiyaha nafta.** Muhiimad intee leeg ayay leedahay nolosha qofku? Ciise waxa uu sheegayaa inay ka muhiimsantahay dunida oo dhan! (aayadda 36). Si uu u badbaadiyo, qofku waa inuu is dafiro oo isu dhiibo gebi ahaanba Masiixa (aayadda 35). Kuwa aan diyaar u ahayn inay qiimahan ugu kacdo waxa la siiyay digniin cad (aayadda 38). Maanta waxaad ku dhex nooshahay duni uu denbi hadheeyay, markaa ha ka xishoon inaad si kal iyo laab ah ugu noolaato kan adiga ku badbaadiyay ee badbaadiyay naftaada. I Butros 2:9 waxay kaa caawinaysaa inaad jihada saxda ah aaddo.

‘*Badbaadiye oo ah Masiixa Rabbiga ah*’ (Luukos 2:11).

**Markos 9:2-13** **Maalinta 21**

**‘Masiixa’ (2)**

Shalay waxaynu soo akhrinay sidii Ciise u muujiyay inuu yahay Masiixa. Maantana aynu dhegaysano saddex cod oo ansixinaya sheegashadaas.

**Codka nebiyada**. Ciise markii uu Butros, Yooxanaa iyo Yacquub u kexeeyay buurta dusheeda muuqaalkiisii wuu beddelmay (aayadaha 2-3) waxaana la arkay iyadoo Muuse iyo Eliyaas ay isaga la hadlayaan (aayadda 4). Muuse waxa uu ahaa kii sharciga Yuhuudda la siiyay lasoo mariyay sidoo kalena Eliyaas waxa uu ahaa nebi weyn. Xertii arrintan daawanaysay waxay tani u ahayd caddayn ah in Ciise uu dhammaystiray Axdiga Hore isagoo ah Masiixa Ilaah. Eeg waxa uu Ciise ka yidhi Axdiga Hore sida ku sugan Yooxanaa 5:39.

**Codka Ilaah**. Intaas kadib, buurta dusheedii waxa isku gadaantay daruur (aayadda 7). Axdiga Hore dhexdiisana middan Yuhuuddu waxa ay la xidhiidhin jireen joogitaanka Ilaaah (eeg Baxniintii 16:10). Daruurtii waxa markaas ka yimid codka Ilaah oo xerta ku

taxallujinaya inay dhegeystaan Ciise oo ay addeecaan (aayadda 7). Mardanbe, Butros waxa uu ansixiyay saamaynta ay middani iyaga ku yeelatay (eeg II Butros 1:16-18).

**Codka taariikhda**. Markii ay buurta kasoo degeen Ciise waxa uu xerta u sheegay inaanay cidna u sheegin waxa ay arkeen ilaa inta uu Wiilka Aadanuhu kuwa dhintay kasoo sarakacayo (aayadda 9). Xerta oo u malaynayay in ay middani tahay dhammaadka dunida, waxa ay Ciise xasuusiyeen waxsii sheegidda ku sugan Malaakii 4:5-6 ee sheegaysa in ugu horraynta uu yimaaddo Eliyaas. Ciisena waxa uu iyaga u sheegay in Eliyaas (Yooxanaa Baabtiisaha) uu horeba u yimid si uu jidka ugusii xaadho isaga balse la diiday oo isna (Ciise) ay tahay inuu in badan silco oo la diido (aayadda 12). Eeg Luukos 23:11 oo eeg sida uu codka taariikhdu middan u ansixiyay. Noloshiisa, dhimashadiisa iyo sarakiciddiisaba, Ciise waxa uu ku ansixiyay inuu yahay 'Masiixa' (eeg Rooma 1:3-4).

**'***Rabbigay iyo Ilaahayow***'** (Yooxanaa 20:28).

**Maalinta 22** **Markos 9:14-32**

**Hoos u soo deggii!**

Aayadahani waxa ay sii daba socdaan akhriskii shalay. Qisaduna waxa weeyi iyadoo buurtii lagasoo degay oo hoos la yimid oo shalay guul bay ahaydee maanta xaaladdu ay tahay musiibo iyo niyad jab. Aynu eego saddex sababood oo kallifay in xertu ay guuldarraystaan, sidoo kalena bal aynu nafteenna hubinno.

**Tukashadii oo la dhaafay**. Markii xertu ay weydiiyeen Ciise sababtay ay u bogsiin kari waayeen wiilka (aayadda 28) Ciise waxa uu farta ku fiiqay dhibaatada isagoo sheegay in sababtu tahay iyagoo ku guuldarraystay inay tukadaan. Rasuul Yacquub ayaa isla arrintan sheegaya isagoo tilmaamaya in dadku aanay Ilaah haysanin maadaama oonay isaga baryin (Yacquub 4:2). Xaaladdaadu sidan miyay tahay? Waxa hubaal ah in bulshada dhexdeeda aan guul lagasoo hoyin karin haddii aanad shakhsi ahaan feejigneyn oonad Ilaah ku xidhnayn.

**Awood carqaladaysan**. Haddii aan dib ugu noqono Markos 3:14-15, Ciise waxa uu xerta siiyay awood ay ku saari karaan jinniyo, laakiinse arrintan waxa soo hor istaagtay caqabad. Denbiga ayaa hadiyo jeer sidan sameeya isagoo kharriba marag furkeenna (aayadda 14) sidoo kalena adeeggeena ayuu waxtar la'aan ka dhigaa (aayadda 18). U fiirso iyadoo tani ay tahay denbi ah in wax laga tegay oo la dayacay sida ku xusan Yacquub 4:17. Ma jiraa denbi aanad qiranin oonad ka tegin isla markaana noloshaada kharribayaa? Haddii taasi jirto, Ilaah weydiiso inuu middaas kaa samatabixiyo.

**Waxa muhiimadda ay tahay in la siiyo**. Aayadad 29, qoraalgacmeedyada Kitaabka qaarkood waxa ay ku daraan ereyga ah 'soon' oo daba socda salaadda, waxaana fiican in arrintan loo fiirsado. Soonku maaha oo keliya inaan cunto la cunin, laakiin fasiritaankeeda guud waxa uu koobsan karaa waxyaalo badan balse ku fadhiya qiime. Casharka halkan laga baran karaa waxa weeyi markaas in muhiimadda koobaad la siiyo waxa muhiimka ah.Hubi waxyaalaha noloshaada dib dhaca ku keenaya ee guuldarrada kuu horseedaya Ilaahna ka bari inuu kaa koriyo waxyaalahan. Bawlos ayaa arrintan kaga hadlaya Rooma 12:1-2.

'*Rabbiga iyo xooggiisa doondoona, Oo weligiinba wejigiisa doondoona*' (I Taariikhdii 16:11).

**Markos 9:33-50** **Maalinta 23**

## Labo qarsoodi

Ugu horraynta, waxa laga yaabaa inaad ku wareerto aayadahan oo waxyaalo badan ka hadlaya, laakiin haddaad dhug u yeelato waxaad arkaysaa inay ka hadlayaan ugu yaraan labo xaqiiqo oo ku saabsan nolosha Masiixiyadda.

Midda koobaad waxa aan ku magacaabi karnaa **qarsoodiga guuldarrada**. Markii ay gaadheen Kafarna'um, Ciise waxa uu xertiisa waydiiyay wixii ay ku murmayeen intii ay jidka kusoo jireen (aayadda 33). Waxay ka xishoodeen inay arrintaas isaga u sheegaan, waayo waxay ku murmayeen ayaa ahaa midkoodee noqon doona kan ugu weyn boqortooyada Ilaah (aayadda 34). Tani waxa ay ka mid tahay sababihii keentay guuldarradii aan shalay kasoo hadlaynay. Xertu waxay ilaa hadda ku hawlanaayeen danohooda shakhsi ahaaneed, u fiirso sida ay u dhaleeceeyeen ninkii iyaga kooxdooda aan ka midka ahayn (aayadda 38). Isagoo middaas uga jawaabaya, Ciise waxa uu gacmihiisa

ku qaaday ilmo yar isagoo baraya is hoosaysiinta (aayadda 35). Isku hallaynta sida carruurta oo kale (aayadda 37) iyo naxariista (aayadda 41) waxay ahaayeen calaamadaha Masiixiga runta ah. Matayos 23:12 ayaa casharkan ka hadlaya. In hadiyo jeer laga fikiro naftaada uun waxa ay la macno tahay guuldarro.

Arrinta labaadna waxa weeyi **qarsoodiga guusha**. Masiixigu hadiyo jeer marnaba xor kama aha jarribaaddu, laakiin jarribaaddu maaha denb, waayo xitaa Ciise laftiisa aya la jarribay (Cibraaniyada 4:15). Waxa hadaba loo baahanyahay in la waajaho jarribaado badan haddii la adeeco qarsoodiga guusha ee Ciise uu ku bixinayo aayadaha 43-47. Haddii waxkasta ood qabato, meelkasta ood tagto, waxkasta ood aragto ay kugu keenayaan jarribaad, waxa kuu habboon inaad iska jarto. Naftaada dib u habee si aad u yarayso denbiga. Xilliga ugu wanaagsan ee maska suntan ah ee khatarta ah la dilaa waa marka uu ku dhex jiro ukunta! Sida ugu wanaagsan ee denbiga loola tacaalaana waa in laga takhalluso waxa kuu keenaya jarribaadda. Hadiyo jeer noloshaadu ha ahaato mid leh anshax iyo dhaqan suuban waayo tani waxay kaa caawinaysaa dabeecadaha badan ee kuu keenaya guuldarrada. Sidoo kalena Ilaah ka bari inuu kaa dhawro meelkasta oo khatar ku gelin karta.

‘*Oo jirrabaadda ha noo kaxayn, laakiin sharka naga du*’ (Matayos 6:13).

**Maalinta 24** **Markos 10:1-16**

**Labo xaqiiqo oon isbeddelaynin**

Shalay waxaan soo baranay labo qarsoodi oo muhiim u ah nolosha Masiixiyadda. Maantana waxa aan arki doonnaa labo waxyaalood oon weligood is beddelaynin.

**Sharciga Ilaah**. Waxaynu markale arkaynaa Farrisiinta oo Ciise weydiinayay su’aalo, iyagoo isku dayaya inay isaga dabin geliyaan. Xaaladdan iyada ah, waxay weydiiyeen inay bannaantahay iyo in kale in nin naagtiisa uu furo (aayadda 2). Markii Ciise waydiiyay wixii Muuse uu iyaga farayna waxa ay sheegeen in uuse ogolaaday in naagta la furo. Xoogaa way saxsanaaayeen (Sharciga Kunoqoshadiisa 24:1-4) laakiin waxay ahayd oo keliya xaalad keliya, Ciisena waxa uu ugu jawaabay in Muuse arrintaas ogolaaday qalbi engegnaantooda awgeed (aayadda 5). Maaha wax dadka Ilaah u wanaagsan furniinku, laakiin xaalad walba ma jiro wax beddeli kara Ilaah qaynuunkiisa asalka ah ee ilaa Bilowgii 2:24 imikana uu Ciise ansixiyay (aayadaha 6-9). Ilaah qaynuunadiisu isma

bedelaan (eeg Matayos 5:17-18) waxyaalaha uu dadkiisa ka dalbayaana waa inay sharfaan nidarradooda.

**Jacaylka Ilaah**. Sida ku sugan aayadaha 13-16 jacaylka Ciise ee weyn. Sidoo kale waxay tusinaysaa Ciise cid walba uu jecelyahay. Xilligaas iyada ah dadku dan badan may siin jirin carruurta oo xitaa xertu waxay dareemayeen in Sayidka wakhtigiisa aan arrintaas lagaga luminin (aayadda 13), laakiin Ciise waxa uu danaynayay oo wakhti siinayay carruurta. Sidoo kale waxa uu sheegay in dadku ay yeeshaan rumaysadka carruurta yaryar oo kale haddii ay rabaa inay galaan boqortooyada Ilaah (aayadaha 14-15). Muuqaalka Wiilka Ilaah oo carruurta gacmihiisa ku qaadayaa waa wax aad u qurux badan oo sidoo kalena xoog badan. Waxay ina xasuusinaysaa in Ilaah uu dadkiisa u ballanqaaday inuu dhawro oo daryeelo (Sharciga Kunoqoshadiisa 33:27).

‘*anigoo Rabbiga ah isma beddelo*’ (Malaakii 3:6).

**Markos 10:17-31** **Maalinta 25**

## Khatarta ‘waxyaalaha’

Waxaan maanta akhrinaynaa qiso ku saabsan nin dhallinyaro ah (Luukos 18:18) iyo xaqiiqada uu ninkaas la kulankiisa Ciise ka baray.

Eeg waxa uu Ciise yidhi oo eeg **waxa koobaad ee uu xaddiday**. Ninkan dhallinyarada ah ee isaga u yimid waxa uu muujiyay ixtiraam isagoo hoos jilba joogsaday Ciise (aayadda 17). Waxa intaas dheer isagoo nolol fiican ku jiray isla markaasna sida uu sheegay xejinayay Tobanka Amar. Laakiin markii Ciise uu taabtay halka uu wanaaggiisu ku koobanyahay oo ahaa inuu hantidiisa xaraasho, ninkii dhallinyarada ahaa wuu iska tegay isgoo murugaysan (aayadda 22). Waxa uu rabay inuu Masiixi noqdo (eeg su’aashiisa aayadda 17) laakiin muu doonin haddii ay arrintaasi koobsanayso inuu hantidiisa ka tago. Laakiin haddana tan macneheedu waxa uu ka dhignaa inuu jebinayay amarka ugu horreeyay (eeg Baxniintii 20:3).

Haddaba bal dib u eeg **casharka uu Ciise halkan ku baray**. Aayadaha 23-25 Ciise waxa uu ku sheegay in dadka qaniga ay ku adagtahay galitaanka boqortooyada Ilaah. Xertu way yaabeen (aayadaha 24,26), waayo Yuhuuddu waxay rumaysnaayeen in haddii qofku uu yahay qani uu Ilaah jecelyahay. Waxa uu Ciise baray waxa ay ahayd haddii qofku uu xiisaynayo 'waxyaalo' kale iyo adduunyada inuu Ilaah illaawayo. Markii Butros uu ka hadlay in xertu ay waxyaalo badan ka tegeen si ay isaga u raacaan, Ciise waxa uu sameeyay ballanqaadka aayadaha 29-30, isagoo sidoo kalena sii raaciyay in dadka isu maleeya inay horreeyaan ay Maalinta Xukunka danbayn doonaan (aayadda 31). Casharka markaad aad halkan ka baran kartaa waxa weeyi inaanad ku mashquulin dunida oo Masiixa markasta aad noloshaada Muhiimadda koobaad siiso. Ma jiro wax ka qiimo badan xidhiidhka aad la yeelanayso Ilaah. Eeg waxa Ilaah leeyahay sida ku sugan Maahmaahyadii 11:28.

'*Maal hadduu idinku batona qalbigiinna ha raacinina*' (Sabuurka 62:10)

**Maalinta 26** **Markos 10:32-45**

## Xagga Yerusaalem

Ciise waxa uu hadda u jeestay xaggaas iyo Yerusaalem (aayadda 32), inkastoo uu ogsoonaa in taasi ay ka dhigantahay dhimashadiisa.

Intii ay jidka kusii jireen wuxuu xerta u sheegayay wax ku saabsan **siliciisa**. Labo jeer oo hore ayuu Injiilka Markos kusii sheegay dhimashadiisa (eeg 8:31 iyo 9:31). Imikana waxa uu faahfaahin ka bixiyay waxyaalaha xunxun ee ku dhici doona oo dhaboobay. Ciise waxa uu doonayay inuu cadeeyo in dhimashadiisa oo keliya uu ku noqon karay Badbaadiyaha dunida. U fiirso hadalka cad ee ku sugan aayadda 45. Madaxfurashadu waxa weeyi qiime la bixiyo si qofka looga xoreeyo addoonsiga ama haysashada la haysto.

Sidaasoo ay tahay xitaa iyadoo Ciise uu sii sheegay siliciisa ayaa haddana labo ka mida xertu waxa ay ka fikirayeen **naftooda uun**. Halkii Ciise uu ka danaynayay u dhimashada

dadka kale awgood, Yooxanaa iyo Yacquub waxa ay ka fikirayeen uun naftooda iyo mansabka ay heli doonaan (aayadda 37). Su'aasha ku sugan aayadda 38 waxa ay la macno tahay: 'ma xammili kartaan silica aan mari doono oo ma mari kartaan?' jawaabtooduna waxay ahayd haa waan karnaa (aayadda 39)! Ciise waxa uu dabeeto u sheegay inay u silci doonaan rumaysadkooda awgiis (Falimaha Rasuullada iyo Muujintii 1:9) laakiin ay abaalmarinta ku jirto gacanta Aabbaha.

Markii xertii kale gudo galeen inay canaantaan Yooxanaa iyo Yacquub, Ciise waxa uu halkaas ku qaatay jaanis uu iyaga ku barayo **qiimaha adeegista**. Sida ka jirta nolosha caadiga ah ee dunida, Ciise waxa uu sheegay in dadku ay jecelyihiin inay is xukumaan oo kala sarreeyaan (aayadda 42). Ciise waxa uu markaas tusaale uga dhigay noloshiisa isagoo sida ku xusan aayadda 45 sheegay inuu u yimid inuu waxbixyo balse aanu u imanin inuu wax helo. Inuu madaxfurasho u noqdo denbiyada dadka. Naftaada haddaba marwalba ha ka fikirin ee ka fikir dadka kale adoo xasuusanaya in Masiixiyaddu ay tahay doonista in la adeego. Bawlos waxa uu si cad kuugu sheegayaa masuuliyadda ku saaran sida ku sugan Galaatiya 6:10.

'*midkiinba midka kale kalgacayl ha ugu adeego*' (Galaatiya 5:13)

**Markos 10:46-52** **Maalinta 27**

**Ciise wuxuu sameeyay bogsiin**

Mucjisada la yaabka leh ee akhrinteenna maantu waxay ku bilaabantay nin la odhan jiray Bartimayos oo fadhiyay waddada dhineceeda. Saddex waxyaalood oo isaga ku saabsan ayaa qisada lagu xusay.

**Xaaladdiisa xun**. Labo erey oo ku sugan aayadda 46 ayaa waxa ay yihiin inuu 'indho la'aa' isla markaasna 'dawarsanayay/tuugsanayay'. Waxa sidan ka dhigan xaaladda dadka aan Masiixiyiinta ahayn een ogsoonayn xaaladda ay ku suganyihiin – eeg sida uu rasuul Bawlos arrintan ugaga hadlyo II Korintos 4:4. Nolosha uu Masiixu ka maqanyahay waa nolol rajo la'aan ah. Haddii aynu  markaas rumaystayaasha nahay waa inaan ka fikirno dadka xaaladdoodu sidan u xuntahay denbiga aawadiis.

**Qayladiisii aan kala go'a lahayn**. Bartimayos waxa uu maqlay in meesha uu Ciise marayo dabeetana waxa uu qayshadan isaga inuu caawiyo (aayadda 47). Markii dadku isku dayeen inay aamusiiyaanna wuu kasii daray (aayadda 48). Waxa uu go'aankiisu ahaa inaanay waxna ka hor istaagin inuu baahidiisa u bandhigo Ciise (aayadda 50)! Kitaabka Quduuska ahi waxa uu na barayaa inaynaan marqudha uun tukanin balse salaaddeenu ay joogto ahaato. Ciise waxa uu sidan ku baray masaalka ku jira Luukos 18. Sidoo kale, eeg waxa uu Bawlos kaga hadlayo I Tesaloniika 5:17.

**Bogsiintiisa dhammayska tiran**. Bartimayos waxa uu ogsoonaa waxa baahidiisu tahay (aayadda 51), rumaysadkiisa dartiisa waa lagu bogsiiyay oo araggiisii ayaa usoo noqday (aayadda 52). Natiijadii waxay markaas noqotay inaanu halkaas jidka dhiniciisa sii fadhiyin isagoo dawarsanaya, balse waxa uu raacay Ciise (aayadda 52). Halkan waxa ku sugan cashar. Markaad Ciise baryo ugu timaaddo ee baahiyahaaga aad hesho intaasuun ha ku ekaanin. Sayidka ugu hoggaansan noloshaada inaad ku raacdo waxyaalaha uu kuu diyaariyay. Noloshani waxa ay tahay laguu diyaariyayna waxaad ka akhrin karnaa Yooxanaa 10:10. Nolosha Masiixiyadda waxa laga rabaa inay dhammaystiranto oo marwalba korto.

'*ku kora nimcada iyo aqoonta Rabbigeenna ah Badbaadiyeheenna Ciise Masiix*' (2 Butros 3:18).

**Maalinta 28** **Markos 11:1-19**

**Marka Ciise imanayo**

Maanta waxaynu akhriyaynaa Ciise oo Yerusaalem soo galaya, laakiin aayadaha 12-14 waa inaynaan akhriyin ilaa berry laga gaadhayo. Markale, Ciise ayaa waxkasta udub dhexaad u ah.

**Boqortooyadiisa**. Ciise waxa uu si kas ah u doortay inuu Yerusaalem galo isagoo dameer fuushan. Waxa ay ahayd sababtu inuu dadka u muujiyo inuu yahay Masiixa, iyadoo ay tahay inay xasuustaan wixii Ilaah kula hadlay nebigiisa sida ku sugan Sakariyaah 9:9. U fiirso arrintan oo eeg sida uu Kitaabka Quduuska ahi saxda u yahay! Isla markii ay aqoonsadeen waa ay dhawaaqeen iyagoo dhulka qadiifad u dhigay (aayadaha 7-8). Ereyada ah 'kan imanaya' sidoo kale iyana waxa ay tilmaamayeen Masiixa, halka erayga 'Hosana' (aayadaha 9-10) uu ka dhignaa 'badbaadi imika'! Dadku xamaasaddooda waxa ay ugu

malaynayeen in Ciise uu yahay kan jebin doona gumaystihii Roomaanka ee qabsan doonay caasimadda si uu boqortooyadiisa u dhiso.

**Cadhadiisa xaqa ah.** Isla markii uu galay Yerusaalem, Ciise waxa uu tegay macbadka isagoo u fiirsaday waxa halkaas ka socday (aayadda 11). Maalintii xigtay waxa uu ku noqday halkaas isagoo goobtaas wixii ka jiray tallaabo ka qaaday (aayadda 15). Dadku waxay macbadka ka dhigteen sidii suuq oo kale (aayadda 15), halka kuwo kalena ay ka dhigteen jid gaaban oo looga gudbo qaybaha kale ee magaalada (aayadda 16), sido kalena sarriflayaasha ayaa lacagaha isugu beddelayay xujayda (aayadda 17). Ciise kuwaas oo dhan ayuu macbadka ka dareeriyay isagoo tilmaamaya inay tahay goob loogu talo galay in Ilaah lagu caabudo. Aayadda 17 waxaad barbar dhigtaa Yeremyaah 7:11. Waa sax in Ciise boqor ahaan loo soo dhoweeyo, laakiin xasuuso in hadiyo jeer boqorku uu sidoo kale xaq u leeyahay inuu wax xukumo, waxaana tani ay koobsan kartaa inuu beddelo waxyaabo muddo dheer soo jireen ahaa. Ciise haddaba noloshaada ha xukumo una diyaar garow in noloshaada isbeddel ku yimaaddo. Ka fikir waxyaalaha ku sugan Ishacyaah 55:8,9.

'*in Ciise Masiix yahay Rabbiga*' (Filiboy 2:11).

**Markos 11:20-26** **Maalinta 29**

**Wax maqani ma jiraan?**

Haddii aayadaha 12-14 aynu ku xidhiidhino akhriskeenna gaaban ee maanta, waxaynu raad-raaci karnaa saddex waxyaalood oo maqan.

Waxaynu ku bilaabaynaa **midhaha** maqan. U fiirso sida uu Markos uga hadlayo geedka bardaha ah. Waxa uu sheegayaa inuu caleemo keliya uun lahaa (aayadda 13) inkastoo laga rabay inuu midho dhalo marhore. Waxa uu muuqaalkani tilmaamayay Yuhuudda waayo in badan ayay diinta soo haysteen waxaana laga rabay inay midho ruuxi ah dhalaan laakiinse taasi mayna dhicin. Ciise waxa uu sheegay in qofka diintiisa lagu xukumi karo midho dhalista (Matayos 7:20). Xukunka uu Ciise ku fuliyay geedka (aayadda 14) waxa ay digniin u tahay inaan hubino inaan ku taaganahay xaqa iyo inkale.

Waxa labaad ee maqani waa **iimaan**. Butros waxa uu ka yaabay sida uu geedkii bardaha ahaa u engegay (aayadda 21), laakiin Ciise waxa uu middaas kaga jawaabay hubka tukashada rumaysadku ku dheehanyahay taasi oo suurto gelinaysaa inay meesha ka qaado dhibaatooyinka loo malayn karo inay weyn yihiin oo dhan. Sida Ilaah kuu baray inaad barido ugu kalsoonow in baryadaada la aqbali doono.

Baryada rumaysadka lihi inta aanay dhab noqonin oonay wax tar yeelanin waxa horta la rabaa in **cafis** uu la socdo. Aayadaha 25-26, Ciise waxa uu ku caddeeyay inaan u baahanahay inaan wax cafino haddii aan rabno inagana in la ina cafiyo. Tani waxay ka mid tahay waxyaalihii uu Ciise ku celiceliyay markii uu xerta baray Baryada Rabbiga. Waxaad sidan ka akhrin kartaa Matayos 6:9-15. Ilaah waa jacayl, oo innaguna isaga ma weheshan karno oo ma hor istaagi karno iyadoo aynu xiqdi iyo nacayb iyo cafis la'aan dadkale u hayno. Nacaybka qalbigaaga ku jiraa waxa uu kaa hor istaagi karaa in salaaddaada lagaa aqbalo. Ilaah weydiiso inuu middaas kaa caawiyo oo nacaybka qalbigaaga ka saaro isla markaasna uu ku siiyo nimco aad ku cafida kuwa kugu gafa. Efesos 4:32 ayaa ku tusinaysa sababta ay middani muhiimka u tahay.

'*dhaafa oo waa laydin dhaafi doonaa*' (Luukos 6:37)

**Maalinta 30** **Markos 11:27-12:12**

**Sayidka (1)**

Mucaaradadda Ciise way sii kordhaysay, laakiin waxa uu markastaba ahaa Sayidka xaalad kasta iyo dhacdo kastaba.

Akhriskeenna maanta waxa uu ku bilaabmayaa **baadhitaan**. Culimadii diintu waxay isaga weydiiyeen amarka uu ku haysto inuu nadiifiyo macbadka (aayadda 28). Waxa uu ugu jawaabay inuu uga jawaabi doono su'aashaas haddii ay ka jawaabaan in Yooxanaa Baabtiisuhu uu ahaa nebi Ilaah u waxyooday iyo in kale (aayadda 30). Iyagii waxa markaas ku furmay walaac. Haddii ay odhan lahaayeen waxa uu ahaa nebi, markaa Ciise waxa uu weydiin lahaa sababta ay u rumaysan waayeen waxa uu Yooxanaa Baabtiisuhu sheegay ee ku saabsan isaga (Yooxanaa 1:29). Haddii ay odhan lahaayeen muu ahayn nebi,

waxa ay garanayeen in dadkii badnaa ee meesha jooga iyaga weerari dooneen (aayadda 32). Aayadda 33 ayaa waxa ay tilmaamaysaa in iyaga lagaga guulaystay halkaas!

Ciise waxa uu iyaga haddana kula hadlay **masaal**. Si aynu u fahano masaalka waa inaan magacawno dadka metalaya. 'Ninku' (aayadda 1) waa Ilaah; 'beertu' (aayadda 1) waa reer bani Israa'iil; 'beeralaydu' (aayadda 1) waxay ahaayeen taliyayaasha; 'addoomadu' (aayadaha 2, 4, 5) waxay ahaayeen bebiyada Axdiga Hore. Halkan waxa ku ah markaas qisada ku saabsan sida Ilaah iyaga umaddooda ugu wanaagsanaa (aayadda 1) iyo sida ay iyagu u diideen ee u dhegaysan waayeen nebiyada Ilaah. Ugu danbayntii, Ilaah waxa uu soo diray Wiilkiisa (aayadda 6), natiijadiina waxay noqotay sida ku sugan aayadaha 7-8, waana waxsii sheegis muuqata oo ku saabsan dhimashada Ciise. Laakiin qisadu haddana halkaas kuma ayna dhammaanin. Aayadda 9 waxay sii sheegaysaa in Yerusaalem la burburin doono (waxayna ahayd afartan sano kadib) halka aayadaha 10-11 (eeg Sabuurka 118:22-23) ay ka tahay waxsii sheegis ah in Ciise uu maalin ka sarakici doono dhimashada oo uu noqonayo kan dunida oo dhan ka taliya. Hoggaamiyayaashii markaas waxay dareemeen in masaalku iyaga ku socdo oo laga adkaaday (aayadda 12). Xitaa iyadoo ay u muuqato in dadka oo dhammi kasoo horjeedaan, Ciise waxa uu yahay haddana kan ugu sarreeya ee awoodda oo dhan iska leh. Akhri Sabuurka 2 oo ah soo koobista waxa uu Kitaabku ka leeyahya arrintan.

'*isagu waa Sayidka sayidyada iyo Boqorka boqorrada*' (Muujintii 17:14).

**Markos 12:13-27** **Maalinta 31**

## Sayidka (2)

Weli waxa sii socda su'aalihii oo Ciisena waxa uu yahay Sayidka marwalab.

Imitxaanka labaad ee isaga ku socday waxa uu ka yimid Farrisiinta iyo urur siyaasadeed oo la odhan jiray Herodiinta (aayadda 13). Waxay weydiiyeen su'aal ku saabsan **u hoggaansamidda**. Su'aashu waxay ahayd inay sax tahay iyo in kale in Yuhuuddu ay cashuur siiyaan Roomaanka dhulkooda xoogga ku haystay? Halkan markaas waxa ku jiray dabin ay rabeen inay Ciise ku geliyaan. Haddii Ciise uu odhan lahaa 'haa', dadku waxa ay ku eedayn lahaayeen inaanu Yuhuudda daacad u ahayn. Haddii uu odhan lahaa 'maya' iyana waxa ay ku dacweyn lahaayeen Roomaanka. Ciise markaa waxa uu iyaga siiyay jawaab fudud oo macno weyn xanbaarsan (aayadaha 16-17). Casharka aynu markaa halkan

ka baranaynaa waxa uu yahay: haddii aynu nahay Masiixiyiin waa inaynu noqono muwaadiniin wanaagsan oo u hoggaansama sharciga isla markaasna bixiya cashuurta iyo waajibaadka kale ee la inaga rabo oo ah wax faa'ido innoogu fadhiya (Rooma 13:1-7). Laakiin u fiirso iyadoo sidoo kale Ciise uu sheegay in dadku ay Ilaah u hoggaansamaan. Waxa la inaga abuuray ekaanshihiisa (Bilowgii 1:27) isaga ayaana aynu u ahaanay.

Su'aasha xigtaa waxay ka timid dhinaca Saduukiinta (aayadda 18), oo ahaa koox aan rumaysanin sarakicidda. Waxay weydiiyeen su'aal ku saabsan **nolosha weligeed ah**. waxa ay soo abuurteen qiso mala awaal ah oo ahayd haweenay ay iska daba dumaaleen toddobo nin oo walaalo ah (aayadaha 20-22). Waxa markaa ay weydiiyeen Ciise midka naagtan qabi doona aakhiro (aayadda 23). Isagoo uga jawaabaya, Ciise waxa uu u sheegay in nolosha aakhiro aanay sidaas ahayn oonu jiraynin guurkan aynu naqaano oo ay tahay nolol gebi ahaanba ka duwan tan adduunyada (aayadda 25). Kadibna waxa uu jaaniskan uga faa'idaystay inuu middan iyaga uga caddeeyo qorniinka Muuse (oo ay rumaysnaayeen inuu run yahay) oo sheegaya in sarakiciddu ay tahay xaqiiqo (akhri aayadaha 26-27 sidoo kalena eeg Baxniintii 3:6). Arrinta ugu danbaysaa waxa weeyi iyadoo Ciise uu tilmaamay in sababta ay qaladkaas u sameeyeen uu yahay iyagoon aqoon u lahayn Qorniinka (aayadda 24). Baro haddaba ereyga Eebbe haddii aad rabto inaad ogaato jidadkiisa.

'*Maragfurka Rabbigu waa aamin, oo garaadlaawaha ayuu u caq liyeeyaa*' (Sabuurka 19:7).

**Maalinta 32** **Markos 12:28-44**

**Sayidka (3)**

Markos waxa uu muuqaal inoogu muujinayaa afar waxyaalood oo tusinaya sida uu Sayidku u shaqaynayay maalintaas cajiibka ah ee uu joogay Yerusaalem.

**Wadaadkii uu qanciyay**. Ciise waxa uu ka jawaabay su'aashii wadaadka (aayadda 28) isagoo ku xidhiidhinaya Axdiga Hore (eeg aayadah a29-31 iyo Sharciga Kunoqoshadiisa 6:4-5 ioy Laawiyiintii 19:18). Wadaadku wuu ku qancay waxyaalihii Ciise ku hadlay waxaanu garawsaday in waxa ugu muhiimsan noloshu ay tahay Ilaah oo la jeclaado (aayadda 34). Wax lala yaabo maaha in Ciise uu sheego inaanu ka mid ahayn boqortooyada Ilaah (aayadda 34). Waxaan is weydiinayaa inuu xer noqday iyo inkale.

**Qorniinka uu farta ku fiiqay.** Culimada iyo dadka kaleba (eeg Matayos 9:27) waxa ay Masiixa ugu yeedhi jireen inuu yahay ina Daa'uud (aayadda 35) waayo waxay rumaysnaayeen inuu ka iman doono farcanka Daa'uud. Ciise waxa uu haddaba iyaga imika waydiinayaa inay u fiirsadaan aayadda koobaad ee Sabuurka 110 (Daa'uud qoray), oo Daa'uud uu Masiixa imanaya ku tilmaamayo inuu yahay Sayidkiisa (aayadda 36). Markale Ciise waxa uu isku dayay dadka inuu ka tusiyo Axdiga Hore ee ay jecelyihiin inuu isagu yahay Wiilka Ilaah ee ah Masiixa la sugayay.

**Kuwa uu eedeeyay.** Waxay ahaayeen kuwo ka mida culimada oo ahaa kuwa salaadda ku dheeraada (aayadda 40), iyagoo ahaa dad dusha uga eeg kuwo diin leh balse gudaha ka ah kuwo kibir badan (aayadaha 38-39) oo damac badan (aayadda 40).

**Qurbaanka uu ammaanay.** Ugu danbayntii, Ciise waxa uu daawaday dadka soo booqanaya macbadka iyo waxyaalaha ay sadaqad ahaanta ula baxayaan (aayadda 40). Dad qani ahi waxay dhigayeen lacag aad u badan, laakiin inkasta oo haweynayda carmalka ahi ay dhigtay qadaadiic labo midh ah, waxa ay ahayd taasi wax alla wixii ay hanti ka haysatay (aayadda 44) waxaanay sidaas ku kasbatay ammaanta Sayidka (aayadda 43). Waxaad tahay iyo waxaad haysato toona midkoodna kama qarsoona Ilaah. Isaga ma ku sharaftaa noloshaada iyo waxaad bixinaysoba?

'*Sayidow, wax walba waad og tahay*' (Yooxanaa 21:17).

**Markos 13:1-13** **Maalinta 33**

**Imaatinka Labaad ee Masiixa (1)**

Ballanqaadyada ugu cajiibsan ee Ciise sameeyay waxa laga helayaa Yooxanaa 14:3, halkaasna waxa uu ku sheegay soo noqoshadiisa. Waxa ay tani inoo sheegaysaa in Ciise maalin maalmaha ka mida uu ku soo noqon doono dunida. Inkasta oo mawduucan ka hadalkiisu adagyahay, hadana waxaan ogsoonahay in maalin maalmaha ka mida uu Ilaah sharka oo dhan jebin doono oo ka adkaan doono (eeg I Korintos 15:20-28). Cutubkan waxa uu Ciise inoogu sheegayaa waxyaahaba hubaasha ah ee imanaya ka hor soo noqoshadiisa, saddexda cisho ee soo socdana waxaan arki doonnaa waxyaalo kuwan ka mid ah.

akhriskeena maanta waxaynu ku arki doonnaa saddex waxyaalood oo Ciise uu hore usii sheegay.

Ugu horraynta, waxa uu ka digay **burbur**. Markii xertu ay ka hadleen macbadka dhismihiisu cajiibka yahay (aayadda 1), Ciise waxa uu sii sheegay waxsii sheegis aan wanaagsanayn (aayadda 2). Tani waxay dhacday sanadkii 70 C.D. markii Roomaanku ay burburiyeen macbadka.

Markii afar ka mida xertu ay Ciise waydiiyeen goorta waxyaalahani dhacayaan (aayadda 4), Ciise intaa wuu kasii badiyay oo waxa uu sheegay **musiibooyin** intaas ka waaweyni inay dhici doonaan. Dunida (aayadda 7), quruumaha (aayadda 8) iyo Masiixiyiintu (aayadda 9) waxa lasoo dersi doona waxyaalahan. Xitaa qoysaska dhibaatooyin ayaa lasoo dersi doona (aayadda 12). Waxyaalahan oo dhammi waa kuwo maanta dunida ka jira, sidaas darteed, dad badani waxay rumaysanyihiin in soo noqoshadii Sayidku ay dhowdahay (Yacquub 5:8).

Laakiin u fiirso in sidoo kale Ciise uu ballanqaaday **badbaado**. Marka uu Masiixigu waajaho cadaadis, waxa weeyi inuu isku halleeyo Ruuxa Quduuska ahi inuu isaga hoggaamiyo (aayadda 11), waxaana dhici doonta markaas in dunida oo dhan lagu wacdiyo injiilka (aayadda 10). Ugu danbaynta, Ilaah waxa uu ballanqaaday inuu si buuxda nimcadiisa ugu badbaadin doono kuwa xaqa ku taagnaada ilaa dhammaadka (aayadda 13). Soo noqoshada Sayidku maalinwalba way soo dhowaanaysaa markaa waa inaad taas iyada ah u diyaar ahaato marwalba.

'*Ciisahan….sidaad u aragteen isagoo samada u socda oo kale ayuu u iman doonaa*' (Falimaha Rasuullada 1:11).

**Maalinta 34** **Markos 13:14-27**

### Imaatinka Labaad ee Masiixa (2)

Ciise wuxuu sii waday waxa uu sii waday isku xidhka waxsii sheegista ku saabsan burburka Yerusaalem isagoo sii sheegay waxyaalaha dhici doona intaanu imanin dunida mar labaad ka hor.

Ugu horraynta, u fiirso **muuqaalka argagaxa ah**. dhibaatada imanaysaa (eeg 14 iyo Daanyeel 9:27) dadka Yuhuudda waxay ula muuqanaysaa wax xun, waayo waxay ka hadashay marka ay Roomaanku burburin doonaan Yerusaalem ee macbadkana ay dumin

doonaan. Ciise waxa uu markaas u sheegay sida ay uga baxsan lahaayeen xaaladdaas xun (aayadaha 14-18) iyo waxa ku dhici doona kuwa aan sidaas samaynin (aayadda 19). Waxyaalahani waxay dhaceen soddon sano dabadood. Waxa dhintay in ka badan hal milyan oo qof, waxaana badbaaday oo keliya kuwii argagaxaas uga baxsaday magaalada la cuno qabateeyay.

Ciise kadibna waxa uu xerta (iyo inagaba) uga digay **waxbarista beenta ah ah bidcada**. Bidco macneheedu waxa weeyi waxbaris been ah, sida ku sugan aayadaha 21-23 Ciise waxa uu ka digay intaanu imanin ka hor inay soo bixi doonaan macallimiin badan oo beena oo odhan doona waakan Masiixii (aayadda 21 barbardhig aayadda 6). Maanta waxyaalahan oo kale waynu arkaynaa waayo waxa jira kooxo badan oo bidco ah oo dadka waxbaris beena ku khiyaaneeya. Ka digtoonow markaas bidcada oo xasuuso in Ciise laftiisu uu yahay jidka, runta iyo nolosha (Yooxanaa 14:6).

Ugu danbayn, maanta waxa aan dhiirrigelin ka heli karnaa **ballanqaadka rajada**. Waxa dhici karta inaynaan si buuxda u wada fahmin aayadaha 24-25, laakiin waxa hubaal ah in Ciise uu soo laaban doono oo taasina ay noqon doonto awood weyn iyo ammaan (aayadda 26). Qaybkasta oo dunida ka mida waxa uu kasoo ururin doonaa dadkiisa uu doortay (aayadda 27). Kuwani waa kuwo ka mida ereyada waaweyn ee Kitaabku u adeegsaday Masiixiyiinta, tusaale ahaan ka eeg I Butros 1:1-2. Waxa dhici karta inaynaan ogaanin waxa uu mustaqbalku inoo sido laakiin waxa hubaal ah inaan mustaqbalka aan ku farxi doonno ballanqaadyada Ilaah ee hubaasha ah sida ku sugan I Tesaloniika 4:15-18!

‘*ku sugayno … Rabbi Ciise Masiix*’ (Filiboy 3:20).

**Markos 13:28-37** **Maalinta 35**

**Imaatinka Labaad ee Masiixa (3)**

Akhrinta maanta waxaynu kusoo khatimi doonnaa cutubkii cajiibka ahaa ee ku saabsanaa soo noqoshada labaad ee Masiixa.

**Runta**. Xaqiiqada ah in Ciise uu iman doono waxa ay ka mid tahay waxyaalaha hubaasha ah ee Qorniinku ina barayo. Axdiga Cusub oo keliya waxa arrintan lagu xusay ilaa 300 oo jeer! Ciise waxa uu aayadda 31 ku caddeeyay in waxkasta oo arrintan ku saabsan oo ku hadlay ay dhici doonaan. U fiirso sidoo kale waxa xerta loogu sheegay Falimaha

Rasuullada 1:11. Kitaabku waxa uu markaas inoo sheegay inay imaatinka labaad ee Masiixu uu yahay wax hubaala oo dhici doona.

**Wakhtiga.** Dad badan ayaa isku dayay inay sii sheegaan wakhtiga uu Masiixu soo noqon doono laakiin dhammaantood waxa caddaatay inay qaldanyihiin. Ciise waxa uu sii sheegay inay calaamado jiri doonaan (aayadaha 28-29), laakiin waxa uu sidoo kale muujiyay in arrintaas uu ogyahay Ilaaha ah Aabbaha oo keli ahi (aayadda 32).

**Shaqada.** Waxa aan ogsoonahay in Ciise imanayo laakiin garan mayno wakhtiga ay tahay. Maxaa haddaba inagu waajiba inaan samayno? Jawaabta su'aashan waxa aynu ka helaynaa aayadahan iyadoo amarka Ciise bixiyayna uu yahay digtoonaada (aayadda 33); soo jeeda (aayadda 33); feejignaada (aayadda 37). Haddii qof caan ahi ballanqaado inuu gurigaaga soo booqanayo oo laakiin aanu ku siinin wakhti mucayan ah, waxa hubaal ah inaad marwalba heegan ku jirayso. Masiixi haddaad tahay, waxa lagaa rabaa inaad u noolaato Masiixa ood isaga u adeegto, adiga oo sugaya maalinta cajiibka ah ee uu iman doono inaad isaga la jirto. Qayb waloo noloshaada ka mida waa inaad ku xasuusato soo noqoshada Sayidka. Eeg sida uu rasuul Yooxanaa arrintan ugaga hadlayo I Yooxanaa 2:28. Hubi inaad diyaar u tahay iyo inkale soo dhoweynta Boqorka haddii taasi ay dhacdo inta aad nooshahay.

'*Waxaa barakadaysan addoommadaas, kuwa sayidku goortuu yimaado, uu helo iyagoo soo jeeda*' (Luukos 12:37).

**Maalinta 36** **Markos 14:1-16**

**Arrimo isusoo ururay**

Cutubkan waxynu ka akhrin doonnaa dhacdooyin horseedaya Masiixa in iskutallaabta lagu qodbo. Akhriska maantana waxaynu ku arki doonnaa saddex eray oo soo ururinaya fikirro dadku qabeen oo innagu hoggaaminaya inaan is weydiinno saddex su'aalood oo muhiim ah.

**Nimco**. Dhaqankii ka jiray Falastiin waxa uu ahaa in dadka martida ah ee la sharfayo dhibco yar oo cadar ah loo mariyo, laakiin markii Ciise uu guriga Siimoon u tegay cunto, waxa dhacday inay haweenay quraarad dhan oo cadar ah oo qaali ah ku shubtay Ciise (aayadda 3). Markii kuwo ka mid ahaa martidu ay arrintaas dhaleeceeyeen, Ciise waxa uu ammaanay haweynaydii (aayadda 6) isaga oo sheegay in meelkasta oo injiilka lagu wacdiyo qisadeeda in lagu xusi doono (aayadda 9). Ma doonaysaa inaad si daacada ugu adeegto Sayidka waxkastaba ha kugu qaadatee?

**Damac.** Laakiin qisadan wanaagsan waxa ku hareeraysnaa khatar (aayadaha 1-2, 10-11). Wadaadkii sare iyo culimadii diintu waxay rabeen inay Ciise qabtaan oo dilaan (aayadda 1) iyadoo Yuudas Iskaariyot isna uu isu beddelay khiyaanoole (aayadda 10). Waxa uu ka mid ahaa xerta, laakiin waxa duufsaday damaciisa (isbarbar dhig aayadda 11 iyo Yooxanaa 12:6). Ciise miyaad ka qarinaysaa ama damcaysaa wax isagu uu xaq u leeyahay?

**Mahadnaq.** Waxa lagu jiray diyaargarayntii iidda weyn ee Yuhuudda oo la odhan jiray Iidda Kormaridda (aauadaja 12-16). Waxa Yerusaalem sannad walba munaasabaddan awgeed isugu iman jiray dad tiradoodu gaadhayso ilaa saddex milyan oo qof si ay ugu dabbaal degaan bixintii Ilaah kasoo samatabixiyay addoonsigii Masar boqolaal sano hortood (qisadan waxaad ka akhrin kartaa Baxniintii 12, iyo gaar ahaan aayadaha 13-14). Iyadoo lagu jiro mugdi iyo khatar, Ciise waxa uu awooday inuu xertiisa ku hoggaamiyo mahadnaq. Adigu Ilaah ma ugu mahadnaqdaa waxyaalaha wanaagsan ee uu kuu sameeyay? Kolosay 1:12-14 ayaa arrintan taabanaysa.

‘*Wax walbana ka mahad naqa*’ (I Tesaloniika 5:18).

**Markos 14:17-31** **Maalinta 37**

## Cashada Rabbiga

Aayadahani waxay inoo sheegayaan sidii Ciise u dejiyay adeegga aynu u naqaanno Cashada Rabbiga. Halkan waxa ku sugan saddex arrimood.

**Iskutallaab**. Waxay ahayd hadda maalin Khamiis ah, oo Ciisena waxa uu ogsoonaa in saacado gudohood lagu qaban doono lana dili doono, iyadoo uu khiyaanayn doono isla markaana uu gacan gelin doono mid ka mida xertiisa meesha la fadhiday (aayadaha 18-20). Mardanbena (aayadda 27) markii uu Masiixu sheegay in xertiisa oo dhammi ay dayrin doonaan oo ka carari doonaa, waxa faanay Butros oo sheegay inaanu weligii ka tegi doonin isaga (aayadaha 29, 31), laakiin sidaynu arki doonno sidoo kale isaga laftiisu wuu ka tegay Sayidkiisa. Kitaabku waxa uu leeyahay, 'dhammaan way denbaabeen' (Rooma 3:23) markii Ciise uu iskutallaabta ku dhintayna waxa uu u dhintay denbiyada dunida oo dhan (I Yooxanaa 2:2).

**Axdi.** Markii cuntadii la gudo galay cunisteeda, Ciise waxa uu qaaday kibis waxaanu yidhi, 'tani waa jidhkayga' (aayadda 22), kadibna waxa uu qaaday koobka isagoo yidhi, 'kani waa dhiiggayga' (aayadda 24). Sidan waxa uu ku tusiyay in maalinta xigta jidhkiisa iyo dhiiggiisa loo bixin doono kuwo badan oo taasina ay tahay axdiga uu asaasayo (aayadda 24). Axdiga Hore waxa uu ku jiraa Baxniintii 24:3-8, halkaas oo aad arkayso in lagu baaqay in dadku addeecitaan la yimaaddo. Sidaynu ognahay, dadku addeecitaan lama imanin, sidaas darteedna waxa yimid Ciise oo la yimid addeecitaan buuxa dabeetana noqday qurbaanka denbiyada dadka ee Ilaah hortiisa ciddii rumysata xaqa kaga dhigaya. Haddaad akhrido I Korintos 11:23-29 waxaad arkaysaa in Masiixiyiinta loo sheegay inay addeecaan doonista Masiixa oo Cashada Rabbiga ay xusuus ahaan u sameeyaan (aayadaha 24-25) iyagoo xasuusanaya noloshiisa iyo dhimashadiisa.

**Boqrid.** U fiirso aayadda 28! Waxay ku bilaabmaysaa 'laakiin markii kuwii dhintay layga sara kiciyo…' Iskutallaabta dabadeed Ciise waxa uu arkay boqrid. Kitaabku waxa uu sheegayaa inaynu arkayno Ciise oo ku boqran ammaan iyo sharaf (Cibraaniyada 2:9).

'*Waxan xusuustayda u sameeya*' (Luukos 22:19).

**Maalinta 38** **Markos 14:32-52**

## Getsamaane

Muuqaalka ka dhex dhacay Beertii Gedsamaane waxa uu ka mid yahay muuqaallada ugu murugada badan Kitaabka Quduuska ahi waxyaalaha uu ka waramayo. Dadkii halkaas joogay qaab fikirkooda waxa lagusoo ururin karaa saddex erey.

**Doonis**. Eraygan waxaan u adeegsan karnaa Ciise. Aayadaha 33-34 waxay tusinayaan dhaawaca uu ka tegay markuu ku sii dhowaanayay dhimashada. Tukashadiisa ku sugan aayadaha 35-36 macneheedu maaha inuuka baqanayay dhimashada, balse waxa weeyi walaaca ku saabsan qaadista culayska denbiyada dadka ee dusha laga saaray naf aan waxba galabsan. Kan aan denbi lahayn ayaa innaga aawadeen denbiile looga dhigay (2 Korintos 5:21). Weligeen ma awoodi doonno inaan fahano jacaylka ku kallifay Ciise inuu denbiile awgeen u noqdo inta uu leegyahay (eeg dhammaadka aayadda 36).

**Taagdarri**. Markii Ciise uu xerta kusoo laabtay wuxuu arkay iyagoo hurda (aayadaha 37). Butros wuxuu hore u sheegay inuu Ciise dartiis waxwalba u samaynayo, xitaa dhimasho (eeg aayadda 31), laakiin haddana isaga aawadiis wuu usoo jeedi kari waayay! In la faanaa waa wax sahlan! Laakiin waa inaan xasuusano in jidhku uu daciif yahay (aayadda 38) iyadoo haddii aan Sayidka isku hallaynana aan dunida oo dhan ka guulaysanayno, jidhka iyo sharkaba (I Yooxanaa 5:4).

**Shar**. Iyadoo Ciise uu xertiisii la hadlayo ayuu Yuudas Iskaariyod soo galay beertii isagoo wata dad badan oo hubaysan (aayadda 43). Waxa uu sameeyay qorshe uu ku khiyaaneeyay Ciise (aayadda 45). Tani waa camalka Shaydaanka! Ciise waa la xidhay (aayadda 46), inkastoo Butros uu dagaal diyaar u ahaana (aayadda 47 barbardhig Yooxanaa 18:10), xertii hadana way kala yaaceen (aayadda 50). Aayadda 50 barbardhig Luukos 5:11. Sharka aadanuhu waxa uu samaynayay wixii ugu xumaa. Aayadahan waxyaalo badan ayaan ka baranaynaa laakiin waxa ugu muhiimsani waa inaynaa weligeen ku faanin taagteenna. Rooma 7:18 ayaa arrintan ka hadlaysa!

‘*Soo jeeda, iimaanka ku adkaada, rag ahaada, xoogooba*’ (I Korintos 16:13).

**Markos 14:53-72** **Maalinta 39**

**Maxkamadayntii (1)**

Waxa aan hadda soo gaadhaynaa labadii jeer ee la maxkamadaynayay Ciise. Marka koobaad waxa la hor geyn doonay culimada diinta ee Yuhuudda, marka labaadna waxa la hor gayn doonay xukuumadda Roomaanka. Akhriskeenna maantana waxa uu ka hadlayaa maxkamadayntii koobaad.

**Dhiirranaan**. Dadka lagu sheegay aayadda 53 waxa ay ahaayeen guddiga sare ee Yuhuudda oo la odhan jiray Sanhedriin (ama guddi), oo awood u lahaa inay la tacaalaan ama niqaashaan arrimaha diinta. Sharcigu waxa uu dalbanayay arrinta laga hadlayo inay lahaato ugu yaraan labo markhaati (Sharciga Kunoqoshadiisa 17:6), laakiin xaaladdan iyada ah xitaa markhaatiyaashii lasoo xushay ayaa wixii ay sheegayeen is-buriyeen (aayadaha 55-59). Ugu danbayntii, wadaadkii sare Ciise waxa uu weydiiyay su'aal (aayadda 61). Si degenaan iyo kalsooni ku jirtona, Ciise waxa uu si cad u sheegay inuu sheegtay inuu yahay Wiilka Ilaah (aayadda 62). Wadaadka sare intaas ayuun buu rabay, sidaa daraaddeedna guddigii sare waxa uu Ciise ku eedeeyay inuu Ilaah aflagaaddeeyay oo taas xukunkeeduna yahay dhimasho (aayadda 64). Laakiin taas iyo weerarkii gardarrada ahaa midkoodna muu jebinin dhiirranaantii Ciise.

**Fulaynimo**. Butros waxa uu markaas jaanis u helay inuu dadkii soo dhex galo oo uu yimaaddo goobtii maxkamadaynta (aayadda 54). Waxa markaas isaga garatay gabadh midiidin ah (aayadda 67). Markiiba waxa uu si dhakhso ah u sheegay inaanu garanaynin waxa ay gabadhu ka hadlayso meeshiina wuu ka cararay (aayadda 68). Markale waxa haddana lagu sheegay inuu xerta ka mid yahay (aayadda 69) laakiin hadana wuu dafiray inuu Ciise wax xidhiidha la leeyahay (aayadda 70). Goordanbe haddana xoogaa ka dib dadkale ayaa aqoonsaday lahjaddiisa reer Galiili (aayadda 70). Isagoo ka cabsanaya in isagana la xidho, waxa uu Butros hadana sheegay been (aayadda 71), markii uu sidaas sameeyayna waxa ciyay diiggii (aayadda 72). Isagoo isku naxsan ayuu xasuustay wixii Ciise isaga kula hadlay (aayadda 30). Ciise iyadoo la maxkamadaynayu ayuu geesinimo muujiyay halka Butorsna uu falaynimo ka muujiyay. Waxa aad marar badan haddaad Masiixi tahay waajihi kartaa maxkamadayn iyo xilliyo adag. Haddaba, weligaa ha ka xishoonin inaad u hadasho Badbaadiyahaaga. Eeg waxa uu Bawlos ku leeyahay 2 Timoteyos 1:7-9.

'*Rabbigu waa ila jiraa, oo anigu ma cabsan doono*' (Sabuurka 118:6).

**Maalinta 40** **Markos 15:1-15**

**Maxkamadayntii (2)**

Akhriska maanta waxaan ku arkaynaa maxkamaydiintii labaad ee Ciise waajihi doonay.

**Xukunka**. Markii laga kexeeyay Guddigii sare, Ciise waxa la hor geeyay Bilaatos oo ahaa xaakinkii Roomaanka (aayadda 1). Yuhuuddu waxay ogsoonaayeen in Bilaatos aanu xiisayn doonin xukun la xidhiidha diin (Ilaah aflagaadayntiisa), sidaas darteed waxa ay Ciise ku eedeeyeen inuu sheegtay inuu boqor Yuhuudda u yahay, oo arrintaasina waxa ay ahayd mid cadho gelin doontay Roomaanka. Markii Bilaatos waydiiyay Ciise in arrintani runtahay, Ciise wuu qirtay (aayadda 2 barbardhig Yooxanaa 18:33-37). Wadaaddadii sare waxa ay sameysteen eedaymo beena oo ay Ciise ku eedaynayeen (aayadda 3), laakiin Ciise marwalba wuu aamusnaa (aayadaha 4-5). Bilaatos arrintaas wuu ka yaabay (aayadda 5), gaar ahaan isagoo ogsoonaa sababta Ciise loo soo xidhay (aayadda 10). Sideed u dhaqantaa marka lagu eedeeyo ee qalad lagaa galo? Way fududahay inaad cadhooto ood dagaallanto, laakiin Masiixiyiintu waa inay u fikiraan sidii Ciise oo kale, waayo iyadoo la aflagaaddeeyay oo la xumeeyay ayaanu ka jawaab celinin (I Butros 2:23).

**Doorashadii.** Xilliga iidda Kormaridda, waxa caado ahayn in hal maxbuus la sii daayo (aayadda 6). Bilaatos waxa uu arrintan u arkay jaanis ku habboon in Ciise maadaama oo bilaa denbi yahay lagusii daayo (aayadda 9). Laakiin waxay wadaaddii dalbadeen in la sii daayo Barrabas oo ahaa dilaa (aayadaha 7, 11). Markii Bilaatos waydiiyay waxa lagu sameeyo Ciise, dadkii badnaa waxay ku qayliyeen 'iskutallaabta ku qodob' (aayadaha 13-14). Sidaas darteed, inkastoo uu ogaa in Ciise aanu eed lahayn, Bilaatos waxa uu dalbay in Ciise jeedal lala dhaco oo isku tallaabta lagu qodbo isagoo raalli gelinaya dalabkii dadka (aayadda 15). Dadka waxa la weydiiyay inay kala doortaan Ciise iyo Barrabas waxaanay doorteen Barrabas, sidoo kale Bilaatos waxa ay ahayd inuu kala doorto waxa saxa ah iyo waxa fudud waxaanu doortay wixii fududaa. Masiixi haddaad tahay waxa hortaada yaalla doorashooyin badan markaa hubaa inaad hadiyo jeer doorashadaada ku salayso raalligelinta Sayidka waxa ay doontaba ha kuugu kacdo ee. Waxa aad tusaalaha middan ku habboon ka helaysaa Yooxanaa 8:29.

'*Waa inaannu Ilaah addeecno intaannu dad addeeci lahayn*' (Falimaha Rasuullada 5:29).

**Markos 15:16-28** **Maalinta 41**

**Iskutallaabta (1)**

Markii maxkamadayntii labaad dhammaatay askartii waxay isu diyaariyeen fulinta xukunka.

Laakiin waxa ay ugu horrayntii waxay gudo galeen inay Ciise ku **jeesjeesaan**. Waxay u geliyeen dhar gaduudan iyo taaj laga sameeyay qodxaan (aayadda 17). Way salaameen oo sidoo kalena ku majaajilloodeen oo askarta oo dhamina middaas way ka qayb qaadatay (aayadda 16).

Waxyar bay ka ogaayeen xaqiiqada ay ku jeesjeesayaan, laakiinse Ciise waxa uu muujiyay **waynaantiisa**. Lix jeer ayaa cutubkan dhexdiisa Ciise loogu yeedhay boqor (aayadaha 2, 9, 18, 26, 32) – waanu yahay boqor. (eeg I Timoteyos 6:13-15). Isagoo sidaas ah oo boqorka ah ayuu haddana Ciise oggolaadan in lagu majaajilloodo oo la candhuufeeyo!

Hadda qisadu waxay u gudbaysaa magaalada dibeddeeda iyo meel la yidhaahdo Golgotta (aayadda 22). Waxay ahayd meel ku caan ah in dadka dilka lagu xukmay lagu dilo, waxaanay hadda noqonaysay meeshii Masiixa **lagu duliay**. Askartii waxay Ciise siiyeen wax xanuunka dhaafiya laakiin Ciise wuu diiday inuu qaato (aayadda 23) oo saacaddii saddexaadna (sagaalkii subaxnimo), iskutallaabta ayaa lagu qodbay (aayadda 25). Labo denbiilayaal ah dhexdooda ayaa lagu xidhay (aayadda 27) waxaana Wiilka Ilaah ee bilaa denbiga ah lagu qodbay iskutallaab iyadoo cagaha iyo gacmahana laga musmaaray. Sidoo kale askartii waxay u qori tuurteen maryihiisii laga saaray intii aan iskutallaabta lagu qodbin ka hor (aayadda 24). Waxyaalahan xunxun oo dhan, Yooxanaa wuxuu inoo sheegayaa inay ahaayeen kuwo hore loogu sii sheegay Ereyga Ilaah boqolaal sano dhacdadan horteed (aayadda 24 barbardhig Yooxanaa 19:24 iyo Sabuurka 22:18). Iskutallaabtu may ahayn qorshe Ilaah dib ka keenay balse laakiin wanka waxa la gawracay waagii dunida la asaasay (Muujintii 13:8). U fiirso sida uu Luukos uu xaqiiqadan dhabta ah ugu qorayo Falimaha Rasuullada 2:22-23.

'*waxaa isaga loo dhaawacay xadgudubyadeenna*' (Ishacyaah 53:5).

**Maalinta 42** **Markos 15:29-39**

**Iskutallaabta (2)**

Akhrinteenna maanta waxaan ku arki doonnaa labo waxyaalood oo udub dhexaad u ah iskutallaab ku qodbista Sayid Ciise.

**Macnaha dayrintiisa**. Saacadihii badnaa ee uu iskutallaabta saarnaa oo dhan, dad badan ayaa meesha ku marayay oo ku majaajiloonayay (aayadaha 29-32). Kadib saacaddii lixaad (labo iyo tobankii duhurnimo) waxa uu dhulku noqday mugdi sida habeenka oo kale (aayadda 33). Saddex saacadood oo mugdi ah dabadood, ciise waxa uu ku dhawaaqay qaylada ku sugan aayadda 34. Maxay ereyadani la macno yihiin? Kitaabku waxa uu sheegayaa in Ilaah necebyahay denbiga oo xitaa aanu eegi karin denbiga (Xabaquuq 1:13). Laakiin sidoo kale waxa uu inoo sheegayaa in Ciise uu denbiyadeenna ku qaaday geed dushiis (2 Korintos 5:21). Imika natiijada denbigu waa ka fogaanta Ilaah (Ishacyaah 59:2) taasoo ka dhigan in Ciise markii uu denbigeenna xanbaartay uu Ilaah isaga ka jeestay iyadoo uu ku dhacayo ciqaabkii iyo xukunkii uu denbigu lahaa. Arrintan weligeen si buuxda u fahmi mayno, laakiin waxaan ku mahadnaqi karnaa in Ciise bixiyay qaantii uu denbigu ku kacay iyo ciqaabtii uu mutaystay.

**Wakhtigii dhimashadiisa.** Markii uu saacado badan silcay dabadeed, Ciise wuu dhintay (aayadda 37). Tan macneheedu waxa weeyi in doonistiisa uu ku bixiyay noloshiisa. Kitaabku wuxuu inoo sheegayaa inuu dhimashadiisa addeecay (Filiboy 2:8). Ma jiro qof weligiis u noolaaday sida uu u noolaaday sidoo kalena ma jiro qof weligiis u dhintay sida uu u dhintay. Wax lala yaabo maaha markaas in askari ka mid ah ciidanka Roomaanku uu ereyadaas ku hadlay isagoo ka faalloonaya waxa uu arkay (aayadda 39). Marka lagusoo noqdo xaggii magaalada, wadaaddadii joogay macbadku waxay arkeen oo ka yaabiyay daahii kala qaybinayay qaybta ugu quduusan macbadka oo xagga sare ilaa xagga hoose labo ugu kala qaybsamay oo kala dillaacay (aayadda 38) – waxay ahayd tani calaamad cajiib ah oo tusinaysa in boqortooyada Ilaah u furantahay dhammaan kuwa isku halleeya Masiixu inuu yahay qurbaanka denbiyadooda u dhintay.

‘*Wiilka Ilaah, kan i jeclaaday oo naftiisa u bixiyey daraadday*’ (Galaatiya 2:20).

**Markos 15:40-47** **Maalinta 43**

**Iskutallaabta (3)**

Qisada ku saabsan dilitaanka axmaqnimada ah ee Masiixu hadda way soo gebogeboobaysaa.

**Murugada dhabta ah**. Markos waxa uu hadda inoo sheegayaa magacyada dadkii arrintaas ka murugaysnaa (aayadaha 40-41). Qofkale oo murugaysnaana waxa uuu ahaa nin la odhan jiray Yuusuf oo ka yimid Arimatiya, isagoo ahaa xubin ka mida Guddiga (aayadda 43). Isagoo isku khatar gelinaya in isaga laftiisu uu xerta ka mid yahay, waxa uu u tegay Bilaatos waxaanu si geesinimo leh u weydiistay maydka Ciise (aayadda 43). Bilaatos waxa uu diray askari si uu u hubiyo inuu Ciise dhintay ka hor inta aanu ogolaanin in maydkiisa la qaado (aayadda 45). U fiirso naxariista iyo dhiirranaanta Yuusuf oo ah labo tusaale oo u wanaagsan Masiixiyiinta.

**Xabaashii aamusnayd.** Aayadda 46 waxay ka hadlaysaa muuqaalladii ugu danbeeyay ee ugu murugada badnaa. Yuusuf waxa uu maydkii Masiixa kasoo dejiyay iskutallaabtii isagoo maro ku duubay ka dibna ku duugay xabaal ka samaysan meel dhagaxyo leh oo afka lagaga daboolo dhagax weyn (aayadda 46). Marar badan dad badan ayaa ku dooda in Ciise aanu dhimanin balse waxa ay afarta injiil oo dhan caddaynayaan inuu dhintay oo la aasay (eeg Matayos 27:62-66). Iimaanka Masiixiyaddu waxa uu ku tiirsanyay xaqiiqooyin adag, ee maaha uu wax ku salaysan dareen. Markhaatiyaashii aamusnaa waxa ay hubiyeen meesha ay ahayd xabaashu si ay mardanbe ugusoo noqdaan oo ay maydka u mariyaan udug ay ku tusinayaan jacaylka ay u qabeen (aayadda 47). Yuusuf iyo kuwii kale way kasoo tegeen iyagu xabaashii aaska dabadiis waxaana magaalada Yerusaalem isku gadaamay mugdi. Kumaankun dada, waxay arrintani u ahayd in ninkii la odhan jiray Ciise halkaas iskutallaabta ka samaysan looxa shaqadiisii ay ku dhammaatay. Laakiin waxa dhici doonay waxa dhici doonay wax tusin doonay in Masiixu uu taariikhda u yahay udub dhexaad.

‘*Masiixu wuxuu u dhintay dembiyadeenna sida Qorniinku leeyahay*’ (I Korintos 15:3).

**Maalinta 44** **Markos 16:1-8**

**Wuu sarakacay!**

Siddeedan aayadood waxa ay koobsanayaan warkii ugu weynaa ee weligeed la maqlo oo ah in Ciise uu dhimashada ka sarakacay oo uu noolyahay!

Si kastaba ha ahaatee, maalintii ugu horraysay ee sarakiciddu waxa ay u bilaabantay si caadi ah, waxaana la **waajahay dhibaato**. Labadii Maryan, kadib marii ay nasteen maalintii Sabtida, waxay soo qaadeen udug si ay maydka Masiixa u mariyaan (aayadda 1). Markii cadceeddii soo baxaysayna, waxay tageen xabaashii (aayadda 2). Laakiin waxa ay arkeen dhibaato: yaa dhagaxii weynaa ee xabaasha afkeeda ku gadaannaa meesha ka qaaday? (aayadda 3). Bal qiyaas sida ay u yaabeen markay arkeen dhagixii ku dednaa xabaasha afkeeda oo laga qaaday (aayadda 4). Sidoo kale waxa kasii yaabiyay markii ay arkeen malag dhex fadhiya xabaasha dhexdeeda! (aayadda 5).

Afkii malagga waxa markaas kasoo baxay war ah **waxsii sheegis la dhammaystiray**. Farriintii malaggu waxay ahayd mid sahlan oo cajiib ah! wuxuu sheegay in Ciise uu sarakacay (aayadda 6). Waxa kale oo intaas uu malaggii ku daray inuu iyaga ugasii hor mari doono Galiili. Waxa uu u sheegay inay halkaas kula kulmi doonaan isaga (aayadda 7). Dib u eeg Markos 14:28 waxaanad arkaysaa in tani ay tahay waxa uu Ciise u sii sheegay inuu samayn doono. Labadii dumar ahaa dib ayay u soo yaaceen iyagoo cabsanaya oo ka baqanaya waxay arkeen inay cid kale u sheegaan (aayadda 8). Laakiin wax runta celin karaa muu jirin, waayo Ciise wuu ka adkaaday awoodaha denbiga iyo dhimashada, waxaana dhaboobay wixii hore loo sii sheegay oo ah in Ciise uu yahay Wiilka Ilaah oo ka sarakacay kuwa dhintay (Rooma 1:4). Xaqiiqada sarakicidda Masiixu waxay udub dhexaad u tahay iimaanka Masiixiyadda, waayo waxay caddayn u tahay in Ilaah aqbalay in dhimashadiisu ay ciqaab u tahay denbiyada dadka. Sidoo kale kuwa isaga rumaysta waxay uga dhigantahay maaha dhacdo taariikhi ah ee waa isagoo ah Badbaadiye nool! Si aad fahan dheeraada uga hesho waxa ay middani ka dhigantahay, eeg ereyada Bawlos ee ku sugan Efesos 1:18-21.

'*Oo innagana isagii buu inala soo sara kiciyey*' (Efesos 2:6).

**Markos 16:9-20** **Maalinta 45**

**Sayidku waa Boqor**

Aayadahani asal ahaan kamay qayb ahayn Injiilka Markos, laakiinse waxa aan shaki ku jirin inay ka qayb yihiin ereyga Ilaah, sida ereyga Ilaah ee ka midka ah Axdiga Cusub oo dhan. Waxa aynu markaas ka qayb gelin karnaa barashadeenna ereyga.

**Kalsooni ayaa la ansixiyay**. Markii uu dhintay xertu way kala yaaceen, waxaanay ka shakisnaayeen wirarka sheegaya inuu dhimashada ka sarakacay (isu eeg aayadaha 10-13 iyo Luukos 24:11), laakiin arrintaas Ciise markiiba wuu shaki saaray (aayada 14). Kalsoonidooda waxa loo ansixiyay sida ugu cajiibsan waxayna ahayd inay lafohooda isugu xishooday shakigoogii hore awgiis.

**Shaqo ayaa la isu xilsaaray**. Aayadda 15 xafid! Waxa weeyi ereyo u ahaaday Masiixiyiinta oo dhan xilli walba (barbardhig 2 Korintos 5:18). Ilaah waxa uu inoo xilsaaray inaan kuwa kale la wadaagno warka wanaagsan ee ku saabsan badbaadada ku imanaysa rumaysashada Ciise Masiix (aayadda 16), oo marka aan isaga addeecnana waxa uu ina siinayaa caddaynta inuu innaga dhex shaqaynayo (aayadda 20).

**Guul ayaa la dhammaystiray**. Gebagebadii waxbarashadeennan, waxa la innaga rabaa in fikirradeenna oo dhami ay ku salaysnaadaan Masiixa laftiisa, oo ah kan sida guushu ku jirto shaqadiisa dhulka ku dhammaystiray. Maalmo kadib waxa uu aaday samada (akhri Falimaha Rasuullada 1:1-11) iyadoo sida uu Kitaabku inoo sheegayana, uu fadhiistay gacanta midig ee Ilaah (aayadda 19). Waxay arrintani tusinaysaa awooddiisa iyo amarkiisa iyadoo ina xasuusinaysa in isagu uu yahay Boqorka boqorrada iyo Sayidka sayiddada (Muujintii 19:16). Aqoonso inuu yahay Sayidka noloshaada oo maalinwalba isaga addeec.

Sida ay qasiidadani leedahay waxaad tidhaahdaa:

Sayidka waa boqor! Waxaan aaminsahay awooddiisa,

Wuxuu xaq u leeyahay inuu maalinwalba iyo saacad walba xukumo,

Waxa uu sheegtay waan aaminsanay oo qalbigaan ku haystaa,

Waxyaalaha uu iga rabana waan fulin doonaa.

‘*Jidadkaaga oo dhan isaga ku qiro, Oo isna waddooyinkaaguu toosin doonaa*’ (Maahmaahyadii 3:6)